



Waxbarashada iyo Tacliinta Socdaalka ah
(Education and Lifelong Learning)

Ka war helka Iskoolda iyo Xanaanooyinka Bristol

Tilmaan Waalidka iyo Daryeelayaasha ku
cusub dalka Ingiriiska [UK]

Somali

Tusmo

Qaybta 1-aad

Hordhac

Iskool tegida

Yaa boos xaq uga yeelan kara iskooladayada?.....5

Waa maxay [state schools] ku?.....6

Ma ka jiraan wax iskoolo ah oo gaar loo maamulaa Bristol?.....9

Caruurta maxay (ikhtiyaaro) heli karaan ka hor intaanay iskoolka tegin?.....9

Sidaan boos uga heli karaa Iskool Bristol ku yaal?.....10

Sidee ilmahayga boos xananada ah ugu helaa?.....12

Sidee ilmahaygu kor ugu gudbi karaa Iskoolka Hoose [uulada]?.....13

Sidee ilmahaygu kor ugu gudbi karaa Iskoolka Dhexe?.....13

Miyaan runtii leeyahay ikhtiyaar iskool ahaan?.....14

Iskoolada Bristol xagay kaga yaalaan?.....15

Xagaan ka heli karaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Iskoolada?.....15

Qaybta 2-aad

Iskoolka Maxaa ka Dhaca?

Sideebuu sanad iskoolku u qaybsamaa?.....16

Maxaa dhaca maalin Iskool joogid ah?.....16

Waa maxay Manhajka wadaniga ahi?.....18

Waa maxay marxalada asaasiga ahi [Foundation Stage]?.....19

- Waa maxay waxa SATS loo yaqaan?20
- Waa maxay GCSE [jii-sii-es-siigu]?.....20
- Waa maxay ikhtiyaarada GCSE [jii-sii-es-siiga] ka banaani?.....21
- Waa maxay waxbarashada 16-jirka ka dib dhacdaa [Post-16 education]?.....21
- Ka waran warbixinada iskoolada iyo galbaha waalidka [la qaabilo]?.....22
- Yaa maxay ka qabta iskoolada?.....24
- Miyey jiraan wax taageero ah oo loo fidsho caruurta baahida Waxbarasho ee Gaara qabta?.....26
- Maxay tahay inaad samaysid hadaad ka wewersan tahay in ilmahaaga dhibaatooyin soo food saareen?.....26
- Ma jiraan wax caawimo dheeraad ah oo loo fidsho caruurta dalka ku cusub oo iskoolada laga helo?.....29
- Taageero nooc ee ah bay heli karaan reer guuraaga loo yaqaan 'jibsi / Gypsies ' iyo socdaalayaashu?.....30

Qaybta 3-aad

Wixii waydiimo muhiim ah ee kale

- Ka waran iskool imaantinka?.....31
- Maxaan sameeyaa hadii ilmahayga la dhibo?.....32
- Ilmahayga diintiisa ma la ixtiraami doonaa?.....32
- Waa maxay iskool ka erentu?.....33
- PRU- ku waa maxay?.....34
- Ka waran arrimaha daaweynta iyo kuwa caafimaad?.....34
- Ka waran hadaan ahay daryeele oo ilmahayga dawladda Hoose xanaanayso?.....35
- Sidaan ilmahayga uga caawin karaa barashada af-ingiriisiga?.....35
- Waa maxay socdaal u baxa Iskoolku?.....35

Ilmahayga dalka debediisa ma u kaxayn karaa wakhtiga iskoolku socdo?.....36

Maxaan ka yeeli karaa cuntooyinka iskoolka iyo hab-wax-cunista ka jirta? John Shaile.....36

Ilmahaygu xaq ma u leeyahay Cunto lacag la'aan ah helitaankeed?.....37

Ka waran dirayska Iskoolka?.....38

Ilmahaygu gaadid iskoolka u qaada ma heli karaa?.....38

Nashaadyo caynkee ah baa la heli karaa ka hor iskoolka iyo ka diba iyo wakhtiyada fasaxa?.....39

Ilmahaygu xiisad musiiqo iskoolka maka dhigan karaa?.....40

Waa maxay khibrad shaqadeedku?.....40

Sidaan iskoolka uga qayb qaadan karaa waalid ahaan?.....41

Waa maxay heshiisyada guriga iyo iskoolku?.....42

Ka waran hadaan dhib qabo ama cabasho?.....42

WARBIXIN DHEERAAD (ADDITIONAL INFORMATION)

Marxadaha [Key Stages] iyo tacliinta da'da 16-jirka [Post-16 Education] ka dib la helo.....44

Maadooyinka Manhajka Wadaniga.....45

Hay'adaha faa'iidada leh ee kale:.....47

Adeega dhalin yarta ee loo yaqaan *Connexions *Laybareeriyada.....47

Warbixin caynkee ah baa heli karaa iga caawisa taageerista waxbarashada ilmahayga?.....51

Cinwaano iyo websaydyo muhiim ah Useful addresses and websites.....53

Erey bixinada sifooyinkaas [Glossary of terms].....56

Hordhac

Buugyarahani wuxuu kaa caawin doonaa sharraxaada habka waxbarashada Dalka Ingiriiska ee magaaladan Bristol u shaqayso.

Dalkan England, caruurta waa ku waajib inay iskoolka bilaabaan sanadka ay ka gaadhaan da'ada 5 jirka waa inay waxbarasho ku sugnaadaan ilaa da'da 16 jirka. Tani waa qaanunka dalka u yaala. Tacliinta xanaanada caruurta waxaa loo heli karaa laga bilaabo da'da 3 jirka ah.

Hay'ada waxbarasho ee Bristol gudaheeda waxaa ka jira 165 iskool; 12 waa xanaano caruureed iyo 3 xarumo sanadada hore iyo 8 xanaano maalmeed, (kuligood waxaa loogu talagalay caruurta 4 sano ka yar), 23 iskool oo caydiga loogu talagalay, (oo da'da 4-7 jirka ah), 22 iskoolo da' yarta ah (ee 7- 11 jirka ah) iyo 73 iskool hoosaad ah (oo 4-11 jirka loogu talagalay) Waxaa jira 17 iskoolada dhexe ah [secondary schools] (oo loogu talagalay 11-16 jirka iyo / 18 jirka) Iyo 10 iskoolo gaar [special schools (kuwaas waxaa loogu talagalay caruurta dhibta waxbarasho ama ta habdhaqan qaba)]. Iskoolada oo dhan waxaa laga dhigtaa manhajka wadaniga ah, waxayse kaloo soo bandhigi karaan nashaadyo kala gedisan oo iskoolka ka baxsan. Iskoolada dawladdu waa lacag la'aan dhigashadoodu qalabka sida buugta iyo qalimaanta (iyo waxa la midka ah) waa la bixiyaa.

Mas'uuliyada maamulida iskool kastaa waxay u taalaa cida maamulkeeda loo doortay. Iskoolada kor ku xusan oo dhan waxaa gacanta ku haya Waaxda Waxbarasho ee Bristol ee loo yaqaan (LEA), kuwaas oo isqorista, gaadiidka, 'Baahida Taclimeedka Gaar' iwm wax ka qabta. Waaxdaas waxbarashada ee Bristol LEA waxay degen tahay dhismaha [Council House] ee ku yaala [College Green] una dhow xarunta magaalada.

Qaybta 1-aad

Iskool tegida

YAA BOOS XAQ UGA YEELAN KARA ISKOOLADAYADA?

Dhammaan caruurta xaq u leh ku noolaanshaha dalka Ingiriiska waxay xaq u yeelanayaan ka helitaanka boos Iskooladayada. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- Caruurta waalidkood haystaan basaboordaha Dalka Ingiriiska oo buuxa.
- Caruurta ka timid dalalka Deegaanka Dhaqaalaha Yurub (EEA).
- Ardayda dal kasta haka timaado ee is-waydaarsi arday ku timid (hal sano)
- Caruurta macallimiinta hab macallin is-dhaafsi ku timid.
- Caruurta waalidka ku nool kana shaqeeya dalka Ingiriiska wax ka badan 6 billood.
- Caruurta waalidka ardaynimo wakhti buuxda ah dalka Ingiriiska ku joogta
- Caruurta haysata joogitaan qaxootinimo buuxda.

Magan-galya doonka codsiga qaxootinimo dhiibtay “sida ugu macquulka badan” kolkay dalka kasoo galeen, ee meelay u kacaan haysan, waxay iminka ka codsan karaan taageero dhinaca guriyeynta iyo baahiyaha nolosha ee daruuriga ah hay’ada NASS (waa Adeega Taageerida Magan-galya doonka Wadanka). Caruurta qoysaska hababkaas lagu taagero kasoo jeeda waxay u leeyihiin xuquuq buuxda daryeelka caafimaad, iyo caruurta da’da waxbarashadu qasabka tahay ku jirta waxay xuquuq buuxda u leeyihiin Waxbarashada. Waxay kaloo xaq u yeelanayaan cunto bixinta iskoolka ee lacag la’aanta ah, caanaha iskoolka iyo dirayska iskoolka.

Caruurta aan si toos ah xaq ugu lahayn ku noolaanshaha dalka Ingiriiska ama aan iskool halkan ka dhigan karinin waa:

- dadka u dhashay dhulka Ingiriiska hoos yimaada
- dadka u dhashay Ingiriiska ee dalka debediisa ku eeg iyo jinsiyadaha ka baxsan dalalka Dhaqalaha suuqa yurub [non-EEA].
- Waaxda waxbarasho ee Magaaladu, hase ahaatee, waxay eegi kartaa kiisaska qof ahaaneed

Hadaad doonaysid joogitaanka Ingiriiska dhawr billood, waxaad ku xisaabtantaa u helitaanka boos iskool ilmahaaga.

WAA MAXAY ISKOOLADA [state schools] ku?

Iskoolada [istayt iskuuls/State schools-ku] waa iskoolo qarashkooda dawladdu bixiso oo aan waalidka wax qarash ah oo imaantinka caruurtooda ah ka qaadin. Ardayda, intooda badani, waxay dhigtaan iskooladaas [istayt iskuuls/State schools-ka]. Meelaha badankooda, caruurta ka dhaxaysa da'da 5-11 jir waxay tagaan Iskoolada Uulada [primary schools], dabadeedna waxaa loo gudbiyaa iskoolada Dhexe [secondary schools], halkaas ay ka helaan tacliinta ilaa 16 jir-sigooda ama ka dib. Iskoolada Hoose iyo kuwa Dhexe caadi ahaan wada jir bay wax u dhigaan oo hablaha iyo wiilashu isku meel bay wax ku dhigtaan. Ma jiraan wax iskoolo jinsi keliyihi dhigtaan Bristol [yacni, lab keliya ama dhedig keliya ah]. Iskoolda dawlada ee Bristol waxay u qaybsamaan afar nooc oo ra'iisi ah:

- [Community schools] Iskoolo Bulsheedka: kuwaas waxaa qarashkooda baxsha waaxda waxbarashada ee Dawlada Hoose kuwaas oo qabin qaabiya is-qorista iskool iyo qabashada boosaska iskoolka. Waxaa maamula gudi iskool maamuleed, hawl socod maalmeedka iskoolka.
- [Voluntary aided schools] Iskoolda Samafalka lagu kabo: Kuwaasi waa Iskoolo hoos yimaada ama Kaniisada Inglan ama ta katoliiga. Wejihinta ay wataan waa mid milada nasaarada ku salaysan oo maamulkeeda waxaa wadaaga kaniisada iyo Waaxda Waxbarashada Dawlada Hoose. Gudida maamusha ayaa dejisa siyaasada isqorita iyo boos qabashada.

- [Voluntary-controlled schools] Iskoolada ay samafalku ay xukumaan waana qaar ay wadajir u maamulaan Waaxda Waxbrashada Dawlada Hoose [LEA] iyo kaniisada, sida iskoolo bulsheedka, LEA ayaa go'aamisa siyaasada isqorista iskool, iyo qabashada boosaska iskoolada.
- [City academies] Iskoolda loo yaqaan (Siti Akaademiis) waa qaar ka madax banaan LEA waxaana toos looga maalgeliyaa dawladda dhexe. Gudidda maamulka ayaa go'aamiya siyaasada isqorista iskoolka iyo boos qabashada. City Academies – waxaa laga yaabaa inay boosaska qaarkood u fidshaan caruurta kartida gaarka ah wata, tusaale ahaan, isboortiga. Wakhtigan xaadirka ah waxaa iminka magaalada Bristol ku yaala hal iskool oo [City Academies] ah.

Qaybahaas, waxaa jira siyaabo kale ay Iskooludu ugu takhususi karaan bixinta faa'iidooyin iyo adeegyo kale:

- **[City Technology Colleges (CTCs)]** koolajyada tiknoolijiyada waxay u furaan yihiin dadka karti kasta wata, iskoolda aan qarash laga bixin ee ardayda da' ahaan u dhaxaysa 11-18 jirka ah. Ulajeedaddoodu waa u fidinta ardayda karti kasta ha lahaadeene, ee degaamada magaalo ku nool ee dalka Inland ah [England], fursad waxbarasho oo si guul leh ee dhinaca shaqooyinka. Koolajka teknoolijiyada, CTC, ee Bristol ugu dhawi wuxuu ku yaalaa [South Gloucestershire].
- **Iskoolada Garka** ah waxaa loogu talagalay caruurta qaba baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah (sida, waxbarashada, caadifad muuqata ama dhibaato hab-dhaqan). Ilme wxaa lagu dari karaa iskool gaar ah keliya hadii ay sitaan waxa loo yaqaan "Warbixinta Baahida Waxbarsho ee Gaarka ah" "Statement of Special Educational Needs", taas ay ogolaatay Waaxda Waxbarashada ee Degmada [LEA] lasoo xiriir:

SEN Section, PO Box 75, Council House
College Green, Bristol. BS99 7EB. Tel: 0117 903 7709
Fagska: 0117 903 7697

Iskoolada gaarka ahi waa iskoolo dhexe oo ku takhasusa takhasus. Kuwaasi iminka waa sida soo socota:

- [Arts] Fanka (Bandhigiisa, muqaal ahaan ama war baahinta) (Cotham and Hengrove Schools)
- [Business and Enterprise] Tijaarada iyo Ganacsiga (Brislington Enterprise College)
- [Engineering] muhandisnimada (Hartcliffe School)
- [Humanities] Cilmiga bani-aadnimiga (Monks Park and St Mary Redcliffe and Temple Schools)
- [Languages] luqadaha (Monks Park School)
- [Mathematics and Computing] Xisaabta iyo Kombutarnimada (St Bernadette Catholic School)
- [Science] sayniska (St Bede's Catholic School)
- [Sports] isboortiga (Ashton Park and Portway Schools)
- [Technology] Tiknolojida (Speedwell Technology College and Bedminster Down School)

Iskooladu waxay buuxiyaan shuruudaha manhajka wadaniga oo dhan, Laakiin waxay culayska saarayaan takhasus la doortay. Waxay leeyihiin qayb ra'iisi ah oo dardar gelinta Waxbarashada gaar ahaan goobaha liita.

MA KA JIRAAN WAX ISKOOLU GAAR LOO MAAMULAA BRISTOL?

Haa, waxaa jira iskoolo gaar ah ama madax banaan halkaas oo waalidku ay tahay in ay bixiyaan qarash caruurtooda si ay u dhigtaan iskoolka ah. Waxaad meeshay ku yaalaan ka ogaan kartaa adoo kala soo xiriiraya Adeegyada Warbixinta Iskoolada Madaxa Banaan [Independent School Information Service] Telefoonka: 01736 799250. Waaxda Waxbarashada Dawlada Hoose, ee, LEA kama bixinayso wax lacag ah oo dheeraad ah iskoolda loo yaqaan, [non-maintained school], wixii la xiriira Baahiyaha Iskoolaynta [Dugsi gelitaanka] Gaarka ah.

CARUURTU MAXAY IKHTIYAARO HELI KARAAN KA HOR INTAANAY ISKOOLKA TEGIN?

Caruurta shan jirka ka yari waxay tegi karaan:

- Iskoolada Dawlada ee xanaanada ah [State nursery schools]
- Xanaano maalmeedka [Day nurseries]
- Fasalo xanaaneed ku dhejisan Iskool Hoose [Dugsi Uulo ah]
- Goob-Dheelid qaybta samafalka ku yaala
- Xanaanooyinka gaar ahaan loo maamulo

Iskoolada Hoose, qaarkood baa sameeya siyaasada iskool u ogolaansho wakhti hore ah, halkaas ay caruurta shan jirka ah u ogolaadaan fasalada Resebshanka, loo yaqaan {reception classes /resebshan klaasis}.

Boosaska caruurta saddexda sano ka yar ee iskool-gelista ka hor, la geeyo ama qaybta samafalka, ha noqoto ama qaybta gaarka ah, ha noqoto sida [playgroups/kooxaha dheelsiinta] iyo [day nurseries/xarun xanaanyn maalmeedka], waxaa guud ahaan qarashkiisa baxsha waalidka.

[Playgroups] iyo **[Day Nurseries]** waxay ka diiwaan gashan yihiin, waaxda, [Nursery Education Grant] waxayna u fidiyaan **[Foundation Stage Curriculum] Manhajka Waxbarasho ee Asaasiga** ah da'aaha 3 sano jir ilaa 5 sano jirka.

Xanaano Maalmeed Bulsheedku [Community Day Nurseries] waxay leyihiin hab ah [qadarka qarash ee aad bixisaa wuxuu la socdaa hadba dakhliga kusoo gala] oo ku xidhan dakhliga qoyska waxayna badanaa ka qoran yihiin waaxda [Nursery Education Grant]. Waxayna u fidiyaan **Manhajka Waxbarasho ee Asaasiga** ah da'aha 3 sano jir ilaa 5 sano jirka.

SIDAAN BOOS ILMAHAYGA/CARUURTAYDA UGU HELI KARAA ISKOOL BRISTOL AH?

Hadaad Bristol ay markii ugu horaysay aad timid (ay tahay) waxaad u baahan tahay helitaanka Iskool markiiba ah. Kooxda iskool ogolaansha [Admissions Team] ee dawladda Hoose ayaa ku siin karta liistada iskoolka. Waxa lagala soo xiriiri karaa telefonka ah:

Telefoonka: 0117 9037694. Fagska: 0117 9037710
Websaydka: www.bristol-city.gov.uk/schooladmissions

Haday tahay markii ugu horeysay ee aad Bristol iskool ka codsatid, oo iskoolkaasina hayo boos banaan oo sanad kooxeedka ku haboon ilmahaaga ah, ogolaanshaha iskool ilmahaas waxaa toos looga qaban qaabin karaa iskoolka ay khusayso.

Nasiibdaro, iskoolo badan oo Bristol ah baa noqon doona qaar buuxa hadaad boos ka codsatid badhtamaha mudo waxbarasho, waxaana laga yaabaa inaad boos ka helin koox da'eedka saxda ah ee iskoolka aad doorbidaysid. Hadii aan boos ka banaanayn iskoolka aad doorbidaysid [iskoolkaas oo ama ah, mid bulshadu gacanta ku hayso, ama hay'ad samafal ahi gacanta ku hayso] waa inaad la xiriirtaa qaybta, [School Admissions/ iskool qorista], oo ka codsataa foomka codsi aad ku dalbanaysid boos iskool kale ah, oo kuwaa badelkooda ah.

Foomka soo buuxi, oo u soo celi:

**School Admissions Team, P0 Box 57, College House,
College Green, Bristol. BS99 7EB.**

Waxaad kaloo rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka qaybta iskool qorista. Tilmaamaha buugyaraha loo yaqaan ['Guides to Primary and Secondary Education in Bristol'] ee hoos ku taxan ayaa ku siin doona warbixin dheeraad ah oo ku saabsan rafcaanada.

Fadlan ogow in gudidda maamul iskooleedku ay mas'uul ka tahay u ogolaanshaha iskoolada, [voluntary aided schools] iyo [academies], oo codsiyada u ogolaanshaha iyo wixii rafcaan ah ee laga sameeyo, go'aan boos laguugu diiday, ay tahay in toos guddi maamuleedkaas iskoolka loogu gudbiyo iyadoo qoraala ah.

Taageero dheeraad ah iyo talo-bixinba waxaa laga heli karaa waaxada [Education Welfare Service] adoo soo wacaya:

**Telefoonka: 0117 903 1660 ee caruurta da'da iskoolada dhexe ah
ama Tel: 0117 903 7098 ee caruurta da'da iskoolada hoose ah**

Waaxda Adeega Daryeelka Waxbarasho [Education Welfare Service (EWS)] ee Bristol, waxaa jira Sarkaal Daryeel Waxbarasho [Education Welfare Officer (EWO)] kaas oo iskoolada la shaqeeya iyo qoysaska magan-galyo doonka iyo qaxootiga ah. Sarkaalkani wuxuu hubiyaa in caruurta magan-galya doonka ah iyo qaxootigu ay noqdaan qaar ka faa'iida fursadaha waxbarasho ee horyaala kalana taliya qoysaskaas waxa laga rabo dhinaca dawladda markay noqoto is-xaadiriska iyo imaantinka iskoolka. Wuxuu kaloo talo-bixin ka baxshaa qawaaniinta shaqo-gaynta wuxuuna qoysaska ka caawiyaa codsiga caydhaha ay u xaq yeeshaan iyo adeegyo kale kuwaas ay u xaq leeyihiin. Sarkaalka waxaa lagala soo xiriiri karaa xafiiska, Ethnic Minority Achievement office, Adoo soo wacaya: **Telefoonka: 0117 903 1365.**

SIDEE ILMAHAYAGA BOOS XANAANADA AH UGU HELAA?

Bristol, caruurta waxay keliya oo tegi karaan Xanaanada dawladda Hoose hadii loo arko inuu yahay “ilma baahi qaba”, Iyo soo gudbin laga soo sameeyey Daryeel Bulsheedka [social worker] ama soo booqde caafimaad [health visitor].

Caruurta waxaa keliya ee loo ogalaan karaa iskool xanaano ah ama fasal xanaano ah oo iskoolka caydiyada [infant school] ama ka hoose ah [primary school] ka dib sanadka saddex jirkooda ka dib. Ahamiyada waxaa la siiyaa ‘caruurta baahida qabta’. Boosas wakhti buuxa ah [Full time places] waxa la baxshaa oo keliya hadii meela hadhsan yihiin ka dib kolka soo codsayaasha oo dhan boosas wakhti gaaban ah [part time] la siiyo.

Hadaad rabtid boos ka codsiga fasalka xanaanada caruurta [nursery class] oo iskool ka mid ah, waa inaad iskoolka toos ula xiriirtaa. Waxa lagu siin doonaa foom codsi iyo warbixin ku saabsan boosaska banaan. Hadaad kulankaas aad tarjumaan u baahatid, iskoolka ayaa kuu qaban kara mid, laakiin fadlan bixi ogeysiin ku filan. Adeegani waa lacag la’aan.

Hadaad wax su’aalo ah oo guud aad qabtid, oo ku saabsan, sanado waxbarashada hore ama bixinta xanaano caruureedka, waa inaad la xiriirtaa **Adeega Bristol ee Macluumaadka Caruurta, Bristol Children’s Information Service** ka wac **Tel: 0845 129 7217** ama fariin emayl ah ugu dir: enquiries@cisbristol.co.uk

SIDEE ILMAHAYGU KOR UGU GUDBI KARAA ISKOOKKA HOOSE?

Caruurta waxay caadi ahaan dhameeyaan iskoolka xananada [nursery school] oo bilaabaan fasalka resebshanka [reception class] ee iskoolka caydiga [infant school] ama ka hoose ah [primary school], ama iskoolka caydiga ama ka da' yarta ah, ama hadaad rabtid codsiga boos faslka resebshanka ah ee iskoolka caydiga ama ka hoose ah, waa inaad foom codsi ah soo buuxisaa oo usoo dirtaa Waaxda waxbarasho ee Dawladda Hoose (LEA) bisha Oktoobar intaanay bilaabmin ka hor. Waxaa jira taariikh go'an oo ay tahay inaad foomkaaga kusoo xaraysid. Fadlan hubi inaanay, taariikhdaasi, ku dhaafin.

SIDEE ILMAHAYGU KOR UGU GUDBI KARAA ISKOOKKA DHEXE?

Hadii ilmahaagu u baahdo ka gudbin iskool da' yar ama hoose oo loo gudbinayo iskool dhexe waxaad u baahan tahay buuxinta foom codsi bisha Oktoobar ka hor intaanay bilaabmin iskoolka cusub oo u dir Waaxda Waxbarasho ee Dawladda Hoose [LEA]. Foomkan, waxaa caadi ahaan kuu soo dira iskoolka Hoose ee ilmahaaga.

Iskoolada dhexe, gidigood waxay leeyihiin, galab furan, badanaa bisha Sebtember, waanad iman kartaa si aad u ogaatid warbixin dheeraad ah oo ku saabsan, oo fiir-firisid shaqaalahana ula kulantid. Iskoolka ayaa kuu sheegi kara taariikhda ama waxa lagu daabici karaa joornaalada deegaanka. Turjumaan waa lagu qaban karaa. Fadlan iskoolka wakhti ku filan sii oo adeegan bixintiisa ah, adeegaas oo ah mid lacag la'aan ah.

Foomamka codsi ee iskoolada cusub waa in la buuxsho ugu danbayn, bisha Oktoobar ka hor intaan ilmahaagu bedelaadiisu bilaabmin. Kuwaas waxaa laga heli karaa cinwaanka hoose ama bogga internetka ayaa laga buuxin karaa, adoo booqanaya:

www.bristol-city.gov.uk/schooladmissions

MIYAAN IKHTIYAAR LEEYAHAY ISKOOL AHAAN?

Markaad boos iskool ka codsatid waxaa lagu waydiin doonaa buuxinta foomka, ilaa saddex iskool magacyadood. Tan waxa loo yaqaan 'doorbadid /Preferences'. Kolka suurtoagal maaha in lagu fidsho iskoolka aad ka dhigatay ikhtiyaarka koowaad, waayo boosaska waxaa laga fidin karaa, hadba tirada ka banaan iskoolkaas. Laakiin, LEA waxay isku dayi doontaa inay kuu fidiso ikhtiyaaro kale oo iskooleed masaafad ilaa saddex mayl u jirta gurigaaga. Hadaadan ogolaan iskoolka lagu fidshay, go'aanka waad ka rafcaan qaadan kartaa.

LEA-ga Bristol waxay soo saaraan laba buugyare si ay uga caawiyaan waalidka iyo daryeelayaasha helitaanka iskool iyo codsiga boos bilawga bisha Sebtember ee sanad kasta.

Kuwaasi waa:

“Your Guide to Primary Education in Bristol”

(buugyarahaas waxaad kaloo ka heli kartaa bogga internetka
<http://www.bristol-lea.org.uk/schools/admissions/primary.html>)

iyo “Your Guide to Secondary Education in Bristol”

(waxaad kaloo ka heli kartaa bogga internetka
<http://bristol-lea.org.uk/schools/admissions/secondary.html>)

Buugyarayaashan iyo foomamkan codsi waxaad ka heli kartaa iskoolada Bristol ama adoo kasoo wacaya Kooxda Iskool Ogolaanshaha:

Tel: 903 7694

fagska: 0117 9037710

ama emaylka: school_admissions@bristol-city.gov.uk

Buugyara-yaanshan waxaa kaloo lagu codsan karaa luqado kale.

ISKOOLADU BRISTOL XAGAY KAGA YAALAN?

Tilmaanta goobaha iskoolada iyo degaanka, fadlan soo wac Kooxda Iskool Ogolaanshaha [School Admissions Team]:

Tel: 0117 903 7694 or look at the maps on:

http://www.bristol-lea.org.uk/schools/pdf/secondary_guide_maps.pdf

XAGAAN KA HELI KARAA WARBIXIN DHEERAAD AH OO KU SAABSAN ISKOOLADA?

Iskool kastaa wuxuu daabacaa 'macluumaad' ama buugyaraha oo tafafiran oo warbixin wata. Iskoolka waxaad ka codsan kartaa nuqul. Iskoolka u sheeg inaad ilmahaaga boos u doonaysid. Iskooladu waa qaar aad u taakulayn badan waxayna ku farxi doonaan boqashadaada iyo la hadalkaaga shaqaalaha. Booqashadu waa mid ka mid ah hababka ugu fiican ee iskool lagu qiyaaso waxaanad toos u araki doontaa goobta ilamahaagu maalin kasta ku qaadan doono. Waxaad wax badan ka baran kartaa soo dhex-marista iskoolka, lagu marsiiyo, adoo arkaaya caruurta iyo macalimiinta iyo siday uwada shaqeeyaan.

Waxaad kaloo wax ka ogaan kartaa booqashada iskoolada websaydyadooda:

<http://www.bristol-lea.org.uk/schools/schools.html>

Isla boggaas internetka ah waxaa ku yaala warbixin ku saabsan jadwlka heerarka iskoolada. Kani wuxuu kuu sheegayaa fiicnaan intee leeg bay caruurta iskoolku ka gaadhay imitixaanka.

Qaybta 2-aad

Iskoolka maxaa ka dhaca

SIDEEBUU SANAD ISKOOLKU U QAYBSAMAA?

Sanad iskoolku badanaa wuxuu ka bilaabmaa maalmaaha ugu danbeeya ee bisha Ogost oo iminka Bristol, waxayna u qaybsamaan lix qaybood. Waxaa jira fasax dhamaadka wakhti waxbarasho kasta. Fasaxa xagaagu caadi ahaan waa shan ilaa lix usbuuc. Iskoolku wuxuu ku siin doonaa liista taariikh fasaxeed ama waad ka war heli doontaa:

http://www.bristol-lea.org.uk/schools/term_dates.html

Iskooladu badanaa waxay xidhaan shan cashoo kale sanad kasta tababarka macalimiinta awgeed. Kuwaas waxa loo yaqaan Maalmaha Tababar Adeega lagu jiro (INSET). Tan waxaa laga yaabaa inay iskool ilaa iskool ku kala duwan tahay fadlan hubi. Waa muhiim in ilmahaaga markasta iskoolka yimaado, aroortii oo lasoo kaxeeyo wakhtiga saxda ah duhurkii.

MAXAA DHACA MAALIN ISKOOL JOOGID AH?

Maalinta lagu qaato, Iskoolka Hoose, waxay ku qaadan doonaan fasal 30 caruur ah ka kooban, oo hal macalin wata, barashada dhawr maado oo manhajka wadaniga ah. Qayb maalin ka mid ah, waxay noqonaysaa hal saacad ah waxbarashada qoritaanka. Waxaa kala oo jira lambarada (lambar shaqo iyo xisaabeed ku haboon da'da ilmaha).

Iskoolada badankooda waxay leeyihin is-urur joogta ah. Iskoolka badankiisu wuxuu kulmaa wakhti gaaban si wadajir ah iyagoo wadaagaya la imaatinka tukashada iyo wax caabudka. Arrintan oo kale waxa lagala hadlaa madaxa iskoolka.

Iskoolda badankooda, maalinta waxaa loo qaybiya nasasho aroortii ah, nasasho qadada ah, si cuntada loo cuno loona dheelo ah, iyo nasasho duhur oo gaaban oo caruurta yar yar ah si ay debeda ugu dheelaan haday cimiladu wanaagsan tahay. Caruurta waxay badanaa qaadan karaan hawl-guriyeed [homework] galab kasta ah.

Maalinta caadiga ah ee **iskoolka Dhexe** waa mid ka duwan ta iskoolka hoose. Ilmahaagu wuxuu heli doona macallimiin kala duwan xiisad kasta ee manhajka wadananiga ah. Ardaydu fasalka ayey u dhex maraan casharada, iyagoo u qaadanaya shandadahooda iyo dhacdooda fasal kasta.

Maalintu waxay ku bilaabmi kartaa, xiisad wax baris ah. Macalinkani wuxuu dusha ka ilaashaa koox macalimiinta sanadkaas. Macalinkan ayaa kula soo xiriiri doona haday jiraan wax cabsi ah ama ilmahaagu wax dhib ah ku jiraan. Waxaa jiri doonta nasasho aroortii iyo mid galabtii ah Waxaa kaloo jiri doona wakhti kooxo arday ahi ay urur ahaan u kulmaan. Fasal kastaa wuxuu yeelan karaa arday ka dhexeysa 20-30 oo maado kasta ah. Macalimiintu waxay bixin doonaan hawl-guriyeed lagu dhamaystiro wakhti go'an. Ardayda oo dhami waa inay xidhaan lebiska iskoolka ilaa sanad waxbarashada 11-aad (da'da 16 jirka). Qaarkood waxay yeelan karaan astaan lebis oo sanad waxbarashad 12-aad iyo 13-aad ah (da'aha 16-18 jirka ah).

Waalid ahaan waxaad xaq u leedahay kala baxa ilmahaaga ee, isu soo ururka, xiisadaha tacliinta diinta, iyo xiisadha barista waxa la xiriira isu taga raga iyo dumarka[sida galmada iyo waxa la halmaala]. Waa inaad kala hadashaa wixii cabsi ah macalin ama madaxa iskoolka ka hor intaanad go'aankaas gaadhin.

WAA MAXAY MAJHAJKA WADANIGA AHI?

Manhajka Wadanagu [National Curriculum] waa hab waxbarista ardaydu iskoolada waxbarashada uga qaataan. Waxay kaloo u qaybisaa horumarada ilmahaaga Marxalado Ra'iisi [Key Stages] oo ballac leh (taas oo daboolaysa wax sanad ka badan). Imtixaano ama baadhitaan-aqooneed ayaa la qaadaa dhammaadka marxalad waxbrasho kasta [Key Stage], si loo qiimeeyo horumarka. Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa faraqa u dhexeeya marxalad ra'iisi ah oo kasta iyo goorta imtixaanada wadaniga ah ee loo yaqaan [Statutory Attainment Tests (SATs)] la qaado.

Da' [Age]	Marxalad [Stage]	Sanad [Year]	Imtixaanada Wadaniga ah [National Tests]
3-4 years [jirka] 4-5 years [jirka]	Foundation [Asaasi]		
5-6 years [jirka]	Key Stage 1	Year 1[sandka 1-aad] Year 2 [sandka 2-aad]	Key Stage 1 SATs
7-8 years [jirka] 8-9 years [jirka] 9-10 years [jirka] 10-11 years [jirka]	Key Stage 2	Year 3 Year 4 Year 5 Year 6	Key Stage 2 SATs
11-12 years [jirka] 12-13 years [jirka] 13-14 years [jirka]	Key Stage 3	Year 7 Year 8 Year 9	Key Stage 2 SATs
14-15 years [jirka] 15-16 years [jirka]	Key Stage 4	Year 10 Year 11	Caruurta qaar baa qaata GCSEs Caruurta badankoodu waxay qaataan GCSEs ama wax kale

Iskoolada Laanta Waxbarashada Bristol oo dhan waxay raacaan manhajka wadanagi ah. Caruurta qabta Baahi Waxbarasho oo Gaar ahi, waxa dhici karta inaany dhigan manhajka noocyada uu ka kooban yahay oo dhan. Waxaana laga dhaafi karaa imtixaanada. Maadooyanka ra'iisiga ah (iyo kuwaas imtixaanka laga qaadayo) waa xisaabta, Ingiriisiga, iyo sayniska, ama Barashada Kombutarada ee Marxalada Waxbarashada 3-aad [Key Stage 3] ah. Waxbarashada xaga muuqaalka guud (nashaadyada isboortiga) waxay ka dhacdaa iskoolda oo dhan waxay taasi u baahan tahay lebisaaad u gaar ah. Dabaashu waxay ku jiri doontaa jadwalka Isboortiga ee iskoolo badan.

WAA MAXAY MARXALADA ASASIGA AHI [Foundation Stage]?

Marxalada **[Foundation Stage]** ama asaasiga ahi, waa marxalada manhajka waxbarasho ugu horeysa. Wejiga gaarka ah ee waxbarasho wuxuu wax ka qabtaa baahiyaha gaarka ah ee caruurta da'da laga bilaabo 3 jir ilaa 5 jirka ah. Waxay leedahay lix dhinac oo waxbarasho:

- Kobcin dhinaca qof ahaan, bulsho iyo caadifad ahaan,
- Wada hadalka, luqada iyo wax akhriya iyo wax qorista.
- Koboca dhinaca xisaabta
- Aqoon u yeelashada iyo fahamka aduunka
- Koboca hal-abuurka

Ka qayb qaadashada waalid waa mid ka mid ah marxaladaha asaasiga ah **[Foundation Stage-ka]**. Shaqaalaha waxaa looga fadhiyaa inay wada xiriir la yeeshaan waalidka, ay ka mid yihiin aqoon isweydaarsi iyo aragtida kobcinta ilmaha.

Caruurta waxay aadi kartaa noocyo kala jaad ah oo waxbarasho marxalada **[Foundation Stage-ka]** oo tani waxay noqon kartaa mid wakhti aan dhamayn **[part time]** ama wakhti waxbarasho oo dhan **[full-time]**.

WAA MAXAY SATS-KU (STATUTORY ATTAINMENT TESTS)?

Imtixaanadani waa qaar la qaato dhammaadka marxalada waxbarashadeedka [Key Stage] kasta, kolka da'da ardaydu tahay 7, 11 iyo 14 sano jir. Dhamaadka [Key Stage-ka] 1-aad, imtixaanada la qaadaa waa akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Dhamaadka [Key Stage-ka] 2-aad, imtixaanada la qaadaa waa Ingiriisiga, xisaabta, sayniska iyo maclumaadka kombutarada (ICT). Imtixaanadani waxay kaa caawiyaan qiimaynta horumarka. Natiijooyinka waalidka ayaa la ogeysiiyaa waxaana laga yabaa in la daabaco. Iskoolka oo dhan ha noqotee, sida "league tables / Jadwalka tartanka," ee joornalada kusoo baxa. Ilmahaaga waxaa laga yaabaa inaanu u baahan qaadashada imtixaan ee sanadka hore ee uu England joogo. Caruurta qaarkood waxay qaadan karaan imtixaanka iyadoo lagu [dul] akhriyayo hadii dhibi ka haysato fahamka iyo akhriska.

WAA MAXAY GCSE-gu [jii-sii-es-siigu]?

GCSE-gu waxay u taagan tahay "General Certificate for Secondary Education/shahaado Guud oo waxbarasha iskool dhexe ah". Waa shahadadii bedeshay , ta loo yaqaanay, ["O" levels iyo CSEs], taas oo la dhaqan-geshay sanadkii 1988. Ardayda badankoodu waxay GCSE-ga ku qaataan maadooyin dhawr ah.

Caadi ahaan waxay qaadataa 2 sano barshada GCSE-gu. Hawl-wax-dhigashadu [Coursework] waa ka qayb GCSE-ga badankooda (waa hawl fasalka ama guriga lagu qabto mudo dheer sida qoraalo [essays], warbixino shaqo [fieldwork reports], fan [art work], naqshadayn [designed products] ama baadhitaano [investigations]).

GCSE-ga waxaa lagu qiimeeyaa [Darjada A* [ilaa] -G] Darjada ilmahaagu gaadho waxay ku xidhan tahy hawl-wax-qabadkisa iyo calaamadaha imtixaan.

Ardaydu imtixaanada, mar uun bay qaadan karaan (dhamaadka sanad waxbarashada 11-aad, da'da 16 jirka ah) ama laba jeer (dhamaadka sanad waxbarashada 10-aad iyo 11-aad).

Heerka caruurta lagu qiyaasa xukum ahaan, iyo tirada loo baahan yahay si loo barto Koolajka waxbarashada Danbe waa , ugu yaraan, 5 GCSE oo darajadaha [A* ilaa C grades] ah, ay ku jiraan xisaab iyo Ingiriisi.

WAA MAXAY IKHTIYAARADA GCSE [jii-sii-es-siigu] KA BANAANI?

Marxalada ra'iisiga ah ee 3-aad [Key Stage 3] ee sanadka 9-aad, ardayda ayaa doorata maadooyinka manhajka ay rabaan barashdooda, ee imtixaankooda GCSE-ga ah. Ardaydu waxay u baahan doonaan kala hadlka waalidkood, macallimiintood iyo la tali-yaha daryeelkooda haday daryeele gaara ah madaxa ku hayaan. Mudada waxbarasho ee ka hor imtixaanadu waxay dabooshaa sanadka 10-aad iyo ka 11-aad, laakiin badanaa iskooladu tan waxay u qaban qaabiyaan wakhtigan oo kale barnaamij.

WAA MAXAY WAXBARASHADA 16-JIRKA KA DIB DHACDAA "POST 16" EDUCATION?

Dhamaadka sanad waxbarashada 11-aad, ardaydu waxay dooran karaan inay sii joogaan ama iskoolka ka baxaan. Iskoolada qarkood ee Bristol waxay ku dhamaadaan sanadka 11-aad, oo ardaydu waa inay, sanadka 12-aad iyo ka 13-aad, iskool kale oo deegaanka ah uga gudbaan. Taa bedelkeeda, waxay dooran karaan waxbarasho si socodsiiinta Koolajka, shaqaalaysiin tababar wadata ama ka nasasho qaadasho waxbarashada ah.

Waxay baran karaan mustawo heer sare ah oo GCSE-ga ah (('A' levels) ama Shaahaado Xirfadeed Wadani oo Guud ah (GNVQ) sanadada 12-aad iyo 13-aad, intaanay jaamacadda u gudbin ka hor.

Shahaadada ['A' levels-ku] iyo [GNVQs-ku] waxaa kaloo lagu baran karaa koolajyada laga bilaabo sanadka 16 aad. Gelitaanka koorasyadu waxay ku xidhaan doonaan maadooyinka lagu baasay [guulaystay] GCSE-ga ama imtixaanka koolaj gelista. Waa inaad soo boqaatid koolajka si aad uga war heshid waxa laga heli karo. **Koolajka keliya ee waxbarashada sii socata ee Bristol ku yaalaa waa [City of Bristol College].**

Halka lagala xiriiraa waa:

City of Bristol College. St George's Road, Bristol BS1 5UA

Tel: 0117 904 5000 Fagska: 0117 904 5050

www.cityofbristol.ac.uk

Ardayda 16-jirka ka weyni ee iskoolka sii jooga ama koolajka waxay u xaq yeelan karaan **Guno Waxbarashadaas** koolaj lagu baxsho, si waxbarashadooda looga caawiyo. Qadarka la siinayaa wuxuu ku xidhan yahay dakhliga qoyska. Hadaad rabtid inaad codsatid waa inaad taa samaysaa ka hor bisha Sebtember ee sanad waxbarashada 11-aad.

Foom codsi ah baa laga heli karaa cinwaaanka hoose:

**Awards Section, PO Box 1111, College House,
College Green, Bristol, BS99 2EZ. Tel: 0117 903 6666**

KA WARAN WARBIXINADA ISKOOLADA IYO GALBAHA WAALIDKA?

Iskoolku wuxuu ku siin doonaa warbixin qoraal ah oo sanadle ah, kaas u ku jiro horumarka ilmahaagu ee maadooyinka manhajka wadaniga ah, iskool imaantinkiisa, iyo faalooyin gaaban oo ku saabsan horumarkiisa guud. Waxaad kaloo heli doontaa natiijada (**SATs**) loo yaqaano, hadii ilmahaagu uu ku jiro dhamaadka marxalada Key Stage 1, 2 ama 3-aad. Iskoolku wuxuu u tarjumi doonaa warbixinada luqado kale laakiin waa in la siiya ogeysiin ku filan. Haday jiraan shay aanad fahmayn warbixinta waa inaad had iyo jeer aad kala hadashaa macllinka ilmahaaga ama madaxa iskoolka.

Ugu yaraan hal mar sanadkii waa in laga marti-qaadaa 'galabta [la kulanka] waalidka' si aad uga hadashid shaqada ilmahaaga iyo horumarkiisa. Kulamadaasi waxay ku siinayaan fursad aad ku ogaatid sida ilmahaagu ku yahay iskoolka. Waxa lagu siin doonaa wakhti aad timaadid, Inkastoo, ballantaada noqon karto 10 daqiiqo keliya waayo macallinka fasalku waa inuu waalidiin kalena la hadlaa. Waxaad heli doontaa fursad aad ku eegtid buug layliga ilmahaaga. Waxaad soo kaxaysan kartaa turjumaan ama waxaad keeni kartaa qof kuu afceliya hadaad doontid. Waxaa kaloo laga yaabaa in la helo shaqaale laba luqoodle ah. Fadlan hubi inaad iskoolka usii sheegtid marka hore hadaad u baahan tahay wax tarjumid qoraal. Hadaad wax ka cabasho ah ka qabtid dhinac ka mid ah iskoolka ilmahaagu helo, uma baahnid inaad sugtid ilaa iyo galabta waalidka la-la kulmo. Waxaad la soo xiriiri kartaa iskoolka adoo ballan ka samaysanaya aad kula hadashid macallinka fasalka iyo madaxa iskoolka wakhtigaad doontid.

Waa muhiim inaad heshid wadatashi waalidnimo, gaar ahaan tanoo ah fursad marka go'aamaha ikhtiyaarada mustaqbalka laga hadlo ama la sameeyo. Hadaadan iman karayn galabtaas shaqo ama caruur hayn awgeed, waa inaad wakhti kale qaban qaabisaa aad macallimiinta ku aragtid.

YAA MAXAY KA QABTA ISKOOLADA?

Iskool kasta waxaa maamula koox madax ah kuwaas oo bulshadu ama dhigto meesha ama doorato. Waxa saaran mas'uuliyad ah inay ilaaliyaan in iskoolka si wacan loo wado. Madaxdaas qaar baa ah madax waalid ah oo waalidiinta kale dooratay waxaanad ka fekeri kartaa inaad ka mid noqotid kuwa loo dooranayo boos kaas. Wixii warbixin faahfaahin ah la soo xiriir:

**Governors' Development Service, Bristol Education
Centre, Sheridan Road, Horfield, Bristol City BS7 OPU
Tel: 0117 9031396 Fagska: 0117 9031289
emaylka: gds@bristol-city.gov.uk**

Madaxa iskoolku wuxuu maamulaa hawl maalmeedka wadida iskoolka.

Macallimiinta fasaladu waxay baraan oo dhaqaaleeyaan ardayda.

Isku-dubaridaha Baahida Tacliin ee gaarka ah (**SENCO**) wuxuu la shaqeeyaa macallimiinta fasaladaasi si uu ugu qorsheeyo taageero caruurta baahida waxbarasho iyo caadifadeed ee 'gaarka' ah qabta.

Macalimiinta muusikada waxay iman karaan iskoolada qaarkooda si ay u bixiyaan casharo. Kuwaas badaanaa waxa qarashkooda bixiya waalidka.

Kalkaaliyaha Maamulida Cuntooyinka Iskoolka (SMSAs) ayaa caruurta dusha ka ilaaliya wakhti qadada. Waxaa mararka qaarkood loo yaqaan "dinner ladies."

Gaadh hayaha dhismaha ayaa mas'uul ka ah badbaadinta iyo daryeelka iskoolka iyo dhulka.

Macallimiintu waxay heli karaan macallin kalkaaliye [**Teaching Assistant (TA)**] ama [**Learning Support Assistants (LSA)**] kala shaqaynaya fasalka. Kalkaaliya macallinka qaarkood waa labo luqoodle.

Karaaniga iskoolku wuxuu ka shaqeeyaa xafiiska wuxuuna kaa caawin karaa su'aal kasta oo aad qabtid. Waxay kaloo hubiyaan in waraaqaha oo dhami ay hagaagsanaan ku simaan yihiin. Waxay kaa caawiyaa madaxa iskoolka maaliyada iyo socodsiinta iskoolka guud ahaan.

Walidiinta qaarkood waxay samafal ahaan ku tabarucaan ka caawinta fasalka gudahiisa ama ka qayb qataan nashaadyada kale si ay lacag iskoolka ugu ururshaan.

La taliye tacliimeed ayaa adeeg dheeraad ah u fidsha macallimiinta iyo shaqaalaha kale, ka jawaabaya baahiyaha caruurta kuwaas oo u baahan taakulayn dhinaca ka kabashada carqaladaha waxbarasho. Si looga caawiyo caruurta gaadhista heerka ugu sareeya ee waxqabad, waxay ka shaqeeyaan iskoolka gudahiisa iyo dibediisaba. Waxay kaloo la taliyaha tacliimeed kala shaqeeyaan arday kala jaad ah, waxay doorbidaan kuwa ugu baahida badan taakulaynta, gaar ahaan kuwaas ka cabanaya dhibaatooyin kala nooc ah. Arrimaha laga hadlayaa aad bay u kala gedisan yihiin, ka bilaw iskool imaantinka, habsanka, gardarada, habdahaqanka iyo ku xadgudubka, ilaa la shaqaynta caruurta taagta iyo kartida leh kuwaas oo ka cabanaya dhibaatooyin.

Dadka da' weynta ah ee kale ee iskoolka ka shaqaynayaa waxay ka iman karaan hay'ado kale sida [Connexions], taas oo bixisa talo-bixiye qof ahaaneed oo ka talinta shaqo-barasho ah. Iskooladu waxay kaloo isticmaali karaan adeegyada dadka waaweyn ee kale ee wakaaladaha debeda ka tirsan si ay ugu gacan gaystaan taageerka habdahaqanka ama la xiriirka waalidka iyo daryeelayaasha sida [Isku-dubridaha Iskaashiga aalidka/ Parent Partnership Co-ordinators], [Saraakiisha Daryeelka Waxbarasho /Education Welfare Officers, Shaqaalaha kasoo qayb-gelinta/ Inclusion Workers] iwm.

MA JIRAAN WAX TAAGEERO AH OO LOO FIDSHO CARUURTA BAAHIDA WAXBARASHO EE GAARA QABTA?

Caruurta baahiyo waxbarasho gaar ah lihi waxaa laga siin karaa caawimo dheeraad ah oo iskoolka ah:

- Dhinac kasta oo shaqo oo manhajka wadaniga ka mid ah
- Asxaab yeelashada iyo la dhaqanka kuwa kale
- Si wacan u dhaqanka iskoolka
- Ishabaynta naftooda
- Noocyo baahiyo dareen ay ka mid tahay dhego la'aanta, maqalka ama araga liita, ama baahiyaha muuqaalka jidhka kuwaas oo saamayn ku yeelan kara waxbarashadooda.

Iskooladu waa inay caruurta oo dhan la shaqeeyaan si ay uga gudbaan carqalado xaga waxbarasho ka jiri kara.

MAXAY TAHAY INAAD SAMAYSID HADAAD KA WERWERSAN TAHAY IN ILMAHAAGA DHIBAATOYIN SOO FOOD SAAREEN?

Hadii ilmahaagu aanu weli iskoolka ku jirin, waa inaad la hadashaa dhakhtar [doctor] ama booqdaha caafimaad [health visitor]. Haday tegayaan xanaano ama iskool, waa inay la hadlaan macallinkooda ama Iskuduba-ridaha Baahida waxbarasho ee Gaarka ah (SENCO). Way samayn doonaan waxa dhici doona kolkaa ka dib. Qorshaha waxaa la yidhaahdaa Qorshe waxbarasho Qof ahaaneed (IEPs). Iskoolku wuxuu samayn karaa dhaqdhaqaaqid caawimo xirfadeed ah iyo u qabin qaabin qiimayn ah oo la qaado. Hadii uu jiro ilmo weli wax cabsi ah keenaya oo aan horumar u samaynayn sidii laga rabay, markaa waxaad codsan kartaa Warbixin Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah (SEN). Kani wuxuu fidin doonaa tageero dheeraad ah, tabaruc ama, bedel keeda, aragti soo jeedin ilmahaaga lagu kaxaynayo ama agaab takhasus oo iskoolka manhajka la wada dhigo.

Buugyara bilaash ah “**Special Educational Needs – tilmaan waalidka iyo daryeelaha loogu tala-galay**” kaas oo bixiya qeexitaan tafatiran oo SEN ah iyo hababka loo maro qeexitaankeeda waxaa lagu heli af-ingiriis iyo luqado kale oo Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha ee [Department for Education and Skills] ah.

Halka lagala xiriiraa waa:

**Area 2T, Sanctuary Buildings, Great Smith St
London SW1P 3BT. DfES Tel: 0207 925 6359
Khadka teegeerada Tel: 0845 603 3360 emayl: dfes@prolog.uk.com
www.dfes.gov.uk/sen**

Hadii ilmahaagu qabo dhibaatooyin waxbarasho, mid muuqaal jidh ama mid caadifadeed, waxaa laga yaaba inaad u baahan tahay la xiriirka Adeega Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah ee Bristol (SEN). Waxaad ka codsan kartaa samaynta qiimayn rasmi ah [Statutory Assessment] oo baahida gaar ee ilmahaaga ah. Waxaad kala xiriiri kartaa [kooxahan]:

[Bariga iyo Badhtamaha Bristol] East & Central Team Telefoonka: 0117 903 6519

[Koonfurt] South Team Telefoonka: 0117 903 6518

[Waqooyiga] North Team Telefoonka: 0117 903 6515

Hadaadan garanayn tee baa degaankaaga ah, fadlan lambaradaas kaad doontid wac waxayna kugu xidhi doonaan kooxda saxda ah. Warbixino kale oo dheeraad ah oo kooxdaas [Special Educational Needs (SEN)] ee Bristol ku saabsan waxaad ka heli kartaa [cinwaankan]:

**Special Educational Needs Section P.O. Box 57,
Council House, College Green, Bristol. BS99 7EB.
Teefoonka: 0117 903 7735 Fagska: 0117 9037738**

Hadaad u baahan tahay talo-bixin dheeraad ah oo madax banaan, marxalad kasta oo Adeega Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah [SEN] ah ha ahaatee ama, aad cabsi ka qabtid sida iskoolku u buuxinayo baahiyaha ilmahaaga, waxaad lasoo xiriiri kartaa Adeega la shaqaynta Waalidka [Parent Partnership Service]. Bristol gudaheeda, kuwani waa Adeeg Taageerid Waalidka (SPSC) waxayna yihiin:

Supportive Parents for Special Children
3rd Floor, Royal Oak House, Royal Oak Avenue
Bristol BS1 4GB. Information & support: 0117 9897725
Maamulida & fagska: 0117 9897724
emayl: supportiveparent@aol.com

Hadaad u baahan tahay wax warbixin dheeraad ah oo ku saabsan ilme naafo qaba ama qaba “baahi tacliimeed gaar ah”, waxaa jirta tilmaame lacag la’aan lagu helo oo loo yaqaan “Find it Out [ka war hel]” oo laga heli karo [kooxahan hoose]:

Equalities and Inclusion Team [Kooxda Sinaanta iyo Kasoo qayb gelinta],
Education and Lifelong Learning. Tel: 0117 9037722
ama emayl: jacqui_price@bristol-city.gov.uk

Waalidku waa inay had iyo jeer ka qayb qaataan go’aamada ku saabsan waxbarashada caruurtooda iyo, hadii cabsiyi jirto, waa in si buuxda loola tashadaa.

MIYEEY JIRAAN WAX CAAWIMO DHEERAAD AH OO LOO FIDSHO CARUURTA DALALKA KU CUSUB OO ISKOOLADA LAGA HELO?

Caruur badan oo dalka ku cusub ayaa si dhakhso leh iskoolka ula qabsada oo si wacan meel uga gaadha.

Kooxda Adeega Natiijo gaadhka dadka laga isirka badan yahay [**Ethnic Minority Achievement Service (EMAS)**] waxay kari karaan u fidinta taageero dheeraad ah iskoolada haysta (leh) arday dheeraad ah oo dalal kale ka yimi. Taageerada Waxbarasho waa mid loo heli karo ardayda af-Ingiriisiga luqad dheeraad ah ku yahay, Ardayda natiijo gaadhkoodu hooseeyo ee kasoo jeeda madowga iyo dadka isir ahaan laga badan yahay iyo qaxootiga iyo magangelyo doonka. Kooxdan waxaa maalgasha dawlada (waaxda Department for Education and Skills (DFES)) iyadoo loo soo maraniyo kooxda [**Ethnic Minority Achievement Grant (EMAG)**]. Qiyaastii 60 iskool oo Bristolku yaala ayaa habkan tabaruc ku qaata oo u adeegsada taageerista ardaydooda Madowga iyo isirada yar kasoo jeeda.

Iskoolku wuxuu waydiin doonaa **Adeega Natiija gaadhka Madowga** iyo dadka isirka yari (EMAS) inay kulan qiimayn ka qaadaan kolka ilmahaagu yimaado ama ay wax cabsi ah qabaan. Kulankan waxaa ku jira waraysiga waalidka ilmaha iyo macallinka iyo siinta ilmaha shaqo uu qabto, iyadoo turjumaan la adeegasanayo hadii loo baahdo. Macallinka kooxdaas (**EMAS**) ayaa kuu kuur geli doona meeshu kasoo jeedo ilmuhu, nooca waxbarasho uu soo qaatay ilmuhu iyo heerka af-Ingiriisiga ilmuhu yahay. Adeegu kolkaa ka dib waxay iskoolka kala talin doontaa ka caawinta ilmaha barashada Ingiriisiga.

Iskoolda qaarkood baa leh maclin ka tirsan (EMAS) oo si joogta ah ula shaqeeya sanadkoo dhan. Haddii maclin ka tirsan (EMAS) uu iskoolka joogo wuxuu qaban qaabin doonaa la kulankaaga usbuucyada ugu horeeya gudahooda ee ilmahaaga loo ogolaado iskoolka. Waxay kaloo isku dayi doonaan qabashada turjumaan hadaad u baahan tahay taas. EMAS waxaa lagala xiriiri karaa lambarka:

Tel: 0117 9031365.

EMAS waxay kaloo leedahay koox qaxootiga iyo magangelyo doonka u qaybsana si ay ugu fidshaan teegerid iyo qiimayn takhasus leh iskoolada arady dhawaan dalka timi leh Kooxdan waxaa lagala xiriiri karaa lambarka:

Tel: 0117 903 1279.

TAAGEERO NOOC EE AH BAY HELI KARAAN REER GUURAAGA LOO YAQAAN 'jibsi / Gypsies ' IYO SOCDAALAYAASHU?

Bristol waxay ka tirsan tahay koox, Laamaha Waxbarasho ee Dawladaha Hoose [LEAs] kuwaas oo adeeg gaar ah oo lagu taageerayo dadka reer guuraaga Yurub [Gypsies] ah oo loo yaqaan (ACTES). Waxay qaban karaan, qaadida qiimaynaha, waxayna bixin karaan agaabka waxqabad waxayna lana shaqan karaan qoysaska. Waxay kaloo bixiyaan baakado maasafad ahaan waxbarasho ah wata oo taageera iskoolka. ACTES waxaa lagala xiriiri karaa:

Avon Consortium for Traveller Education Service
Charborough Road, Filton, Bristol BS34 7RA
Tel: 01454 862620
www.southglos.gov.uk/traveller_ed

Qaybta 3-aad

Wixii waydiimo muhiim ah ee kale

KA WARAN ISKOOL IMAANTINKA?

Marka ilme iskoolka bilaabo, waa mas'uuliyada waalidka / daryeelaha hubinta in ilmahaasi iskool tago maalin kasta oo iskoolku furan yahay, oo wakhtigiisa yimaado. Tani waa mid qaanuun ahaan loo baahan yahay buuxinteeda, oo ah in laga soo baxo mooyaane hadii ilmaha laga carqaldeeyo imaantinka sabab aan laga fursanayn awgeed (tan macnaheedu badanaa waa in ilmahaagu yahay mid aad u buka, oo aan iman karayn).

Iskool iskoolada ka mid ahi, wuxuu diwaan gelin karaa in ilmahaagu habsankiisu mid la ogolaaday yahay – kolka sababta habsanimda ilmahaagu ay buuxiso shuruuda ogolaansho, ama noqdo mid aan la ogolayn – kolka iskoolku aanu aqbalin sababta loo siiyey habsankaas. Waa inaad iskoolka soo wacdaa, maalinta ugu horaysa ee ilmahaagu habasanka yahay, oo sharraxaad ka siisaa, ama aad xaashi ay ku taalo sababtu aad u soo dirtaa.

Waalidiinta caruurta wax ka badan labaatan habsan oo aan la ogolayn lihi taas oo mudo 10 usbuuc dhacday ah waxaa loo gudbin karaa Adeega Daryeelka Waxbarasho [Education Welfare Service (EWS)] si looga fiirsado siinta ganaaxid go'an. Tani waa ganaaxid waalidka loo jarayo. Waalidinta caruurtoodu ay leeyihiin habsan aan la ogolaan oo joogta ah, waxaa laga yaaba in gacanta qaanuunka lala tiigsado, waayo waxay ugu soo diri waayeen caruurtooda iskoolka si joogta ah, waxay xitaa ku geli karaan jeel.

Hadaad meel kale aad u guurtay, fadlan ku wargeli iskoolka ilmahaaga. Hadaad wax su'aala ah aad ka qabtid imaantinka iskoolka, lasoo xiriir [Adeega Daryeelka Waxbarasho], Education Welfare Service:

Tel: 0117 903 1660 (Caruurta Da'da Iskoolka Dhexe)

Tel: 0117 903 7098 (Caruurta Da'da Iskoolka Hoose)

MAXAAN SAMEEYAA HADII ILMAHAYGA LA DHIBO?

Iskoolada oo dhami waa inay yeeshaan siyaasad gardraysiga lagu furdaansho [bullying policy], oo hadii ilmahaagu noqdo mid lagu gardaroodo waa inaad macalinka toos ula hadashaa.

Hadii ilmahaagu uu ka cawdo xadgudub isir ahaaneed nooc kastaba ha noqdee, waa inaad markaana iskoolka la xiriirtaa. Waxay u baahan doonaan buuxinta foom ilaalayn, qaadi doonaan baadhitaan oo talaabo ka qaadi doonaan ay ku furdaanshaa dhibaataada. Buugyare kuu sharraxaya xuquuqdaada ayaad ka heli kartaa:

Race Equality Officer Tel: 0117 903 7595

Ama waxaad buugyaraha aad ka arki kartaa bogga internetka

www.bristol-lea.org.uk/services/eit/incidents.html

ILMAHAYGA DIINTIISA MA LA IXTIRAAMI DOONAA?

Diinta ilmahaagu waa in laga ixtiraamo iskool kasta uu ilmahaasi tago. Miladaha (xiisada diinta) laga dhigo iskoolda bulshada waa mid aad u balaadhan oo saamaynaysa miladaha (la aaminsan yahay) ee waaweyn oo dhan. Caadi ahaan waxay u taalaa ilmahu inuu ka qayb qaato casharada miladaha ama meelaha la isugu yimaado (ee miladahaas ku saabsan), inkastoo waalidku xaq u leeyihin kala bixida ilmahooda nashaadyadaas. Si aad tan u samaysid waa inaad kala hadashid Madaxa Iskoolka.

WAA MAXAY ISKOOL KA ERENTU?

Ka caydhinta iskool [Exclusion/Egaskuluushan] macnaheedu waa ilmahaaga oo aan loo ogolayn imaanshaha iskoolka waayo habdhaqan xun bay ku kaceen awgeed. Madaxa iskoolka [Head Teacher] oo keliya ayaa loo ogol yahay ka erinta ilme iskoolka.

Waxa jira laba nooc oo iskool ka erin ah [exclusion]:

Iskool ka erin Mudo go'an [Fixed Period exclusion]

Iskool ka saaristu, caadi ahaan waa mid mudo gaaban ah, oo uu ka mid yahay erin wakhti qadada ah. Ardaygu mudadaas erinta dhamaadkeeda waa inuu soo laabtaa. Xaaladaha, ay erintoodu tahay wax ka badan hal maalin ah, shaqaa loo dhibaa oo lagu saxaa iskoolka. Qaanuunku wuxuu u fasaxayaa madaxa iskoolka caydhinta arday ilaa 45 maalmood oo maalmaha iskool dhigashada ah, sanad tacliimeed kasta.

Iskool ka erin joogta ah [Permanent exclusion]

Kan waxaa kaloo loo yaqaan caydhin. Tan macnaheedu waa in ilmuhu aanu iskoolka kusoo noqon karin mooyaane haday kusoo cesheen madaxda maamul iskoolku ama guddi rafcaan qaadasho ahi. Hadii arday si joogta ah looga eryey iskoolka, Laanta Waxbarasho ee Dawladda Hoose (LEA) waajib baa saaran inay u fidiso waxbarid ku haboon. Kan waxaa laga yaaba in laga bixiyo iskool kale, ama Qaybta Soo Gudbinta Ardayda [Pupil Referral Unit] ama iyadoo guriga wax lagu barayo (Cashar guriyeed /home tuition). Hoosta ka fiiri faahfaahinta ku saabsan qaybtaas [Pupil Referral Units-ka].

Hadii ilmahaaga eritaan lagusoo rogo waxaad xaq u leedahay, cid ku metesha oo madaxda maamulka iskoolka kuugu gudbisa codkaaga. Hadii madaxda iskoolka xukunta ay, sugto, caydhintaa iskool ee ilmahaaga, waxaad xaq u leedahay rafcaan u gudbiska Guddi Madax banaan. Iskoolkaaga weydiiso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan eritaanka iskool.

PRU-KU WAA MAXAY?

Qaybaha Usoo gudbinta Arday [Pupil Referral Units] nooc iskool ay dhiseen maamulaana Waaxda Waxbarasho ee Dawladda Hoose [LEA], si ay waxbaris ugu fidshaan caruurta da'dii waxbarashadu qasabka ahayd ku jirta oo hadii kale aan la filayn helitaanka waxbarasho ku munaasib ah. Culays saarka qaybtani waa ku celinta caruurta hab iskoolada caadiga ah, ardaydana waxaa ka mid ahaan kara hooyoyinka da'da yar, ardayda iskoolda laga eryey, kuwa iskoolada neceb, caruurta bukta iwm.

KA WARAN ARRIMAHA DAAWEYNTA IYO KUWA CAAFIMAAD?

Markaad dalkan timaadid waa inaad qoyskaaga ka qortaa dhakhtar. Waxa lagu waydiin doonaa inaad iskoolka siisid warbixin caafimaadka ilmahaaga ku saabsan ah. Waxaa jirta kalkaaliso si wadajir ah ula shaqaysa waalidka, macallimiinta, caruurta iyo qoysaska oo bixinaysa caawimada iyo taageerada caadifadeed, mid habdhaqan, ama mid muuqaalka jidhka ah oo aad qabi kartid. Kolka iskoolka la galo, ilmahaaga waxaa la marin doona baadhitaan araga indhaha, mid koritaankiisa ah, iyo mid qiyaasida kobociisa ah. Fasax siintaada [idin bixintaada] ayaa loo baahan yahay baadhitaanadaas oo natiijada waa lagugu wargelin doonaa. Adeeg iskeenid ah oo joogta ah bay kalkaalisada iskoolku ku qabataa iskool Dhexe oo kasta. Waa mid lagugula talinayo in ilmahaagu u tago dhakhtarka ilkaha ee qoyska si joogta ah. Indha baadhuhu ilmahaaga bilaash buu ku arki doonaa.

Wixii faahfaahin ah ee dheeraad ah:

Tel: 0117 957 3206 (North Bristol NHS Trust)

KA WARAN HADAAN AHAY DARYEELE OO ILMAHAYGA DAWLADDA HOOSE XANAANAYSO?

Iskoolada oo dhan waa inay siyaasad dhaqan-geliyaan oo magacaabaan macallin ka mas'uul ah caruurta meel lagu hayo, oo loo yaqaan, [ECLAS] waxaana lagala xiriiri karaa:

Education of Looked After Children Service
1B Amercombe Walk, Stockwood, Bristol. BS14 8AN.
Telephone: 0117 3773 062

SIDAAN ILMAHAYGA UGA CAAWIN KARAA BARASHADA AF-INGIRIISIGA?

Hadii ilmahaagu af-ingiriisiga ku cusub yahay waa muhiim inuu sii wato ku hadalka afkiisa koowaad. Kani wuxuu ka caawin doonaa barashada afkooda labaad, si aad u dhakhso badan. Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga adoo kula hadlaaya afkaaga hooyo guriga gudahiisa, oo sheekooyin labada luqadoodba kula wadaagaya oo kala hadlaya shaqadooda adoo afkaaga kula hadlay.

WAA MAXAY SOCDAAL U BAXA ISKOOLKU?

Kuwani waa booqashooyin waxbarasho kolka caruurta iskoolka laga kaxeeyo. Badanaa waa mid madadalo ah, laakiin waa qaar waxbarasho ee maaha mid fasax ahaan.

Waa muhiim buuxinta iyo soo celinta wixii foomam bixinaya warbixin ku saabsan booqashada. Ilmahaagu ma kari karo tegitaanka socdaalada iskoolka, hadaadan bixin fasaxaaga [idinkaaga] arrintaas oo qoraala ah. Iskooladu waxay fidin karaan taakulayn aad ku buuxisid foomkaas. Badanaa waalidka ayaa la waydiiyaa bixinta qarashka booqashooyinkaas.

Hadii socdaalku ka dhacayo dalka debediisa, markaa ilmahaagu wuxuu u baaahn doonaa baasaboora ama fiise dal lagu galo si uu iskoolka ula safro. **Dadka aan baasaboordaha Ingiriiska sidani waa inay hubiyaan in ilmahoodu dokumentigii ku haboonaa sito, ka hor intaanay u ogolaan ilmahooda safarka.**

ILMAHAYGA DALKA DEBEDIISA MA U KAXAYN KARAA WAKHTIGA ISKOOKU SOCDO?

Hadaad tan ku kacdid waxaad khatar gelinaysaa booska ilmaahaga ee iskoolka, oo maalmaha maqan waxaa lagu tirinayaa habsaanimo. Waalidiinta oo dhan waxaa lagu dhiirigelinayaa qaadashada fasax, wakhtiga fasaxa iskoolka. Hadii ilmahaagu aanu iskoolka joogin, madaxa iskoolka ayaa u baahan ogaanshaha sababta uu u maqnaaday. Iskoolku wuxuu lahaan doonaa siyaasad ku saabsan fasaxyada dabada-dheer ee debeda ah, waa inaada-na waydiisatid tan arageeda. Waxa laga yaabaa in iskoolku go'aansado inuu kuu gudbiyo Adeega Daryeelida Waxbarasho [Education Welfare Service] hadii fasaxyada wakhtiyada waxbarashadu socoto ay saameeyaan tacliinta ilmaha.

MAXAAN KA YEELI KARAA CUNTOOYINKA ISKOOKU IYO HAB-WAX-CUNISTA KA JIRTA?

Iskooladu waxay bixiyaan oo qarash ka qaadaan cuntada maalinta badhtankeeda ee caruurta la siiyo. Laanta LEA-da qasab kuma aha inay caruurta u fidiso caano, laakiin haday doortaan sidaas samynteeda, waa u bilaash caruurta xaq u yeesha cunto lacag la'aan ah helitaankeed. Wakhtiga xaadirka ah iskoolo caydiyo oo badan ayaa midho aroortii baxsha.

Haday jiraan cuntooyinka qaarkood oo aanu ilmahaagu cuni karin kolkaa waa inaad iskoolka ogeysiisaa. Badanaa waxaa la helaa cunto khudaar ah oo iskooladu waa inay baxshaan cunto **Xalaal** ah hadii laga codsado. Iskoolka la hadal hadii aad wax baahi cunto-gaar ah u ilmahaagu leeyahay. Caruur badan ayaa baakat cunto ah guri kasoo qaata. Waxaad kusoo dari kartaa cabitaan inkastoo biyo caadi ahaan la bixiyo.

Kalkaaliyaha wakhtiga qadada loo yaqaan [School Meals Supervisory Assistants (SMSAs)] ayaa wixii dhibaato ah kaa caawin doona. Waa xubno ka mid ah shaqaalaha iskoolka.

Caruurta cunta qadada iskoolka waa inay karti u leeyihiin isticmaalka qaado, midi iyo farageeto. Fadlan iskoolka ogeysii hadii ilmahaagu u baahan yahay wax caawimo ah.

ILMAHAYGU XAQ MA U LEEYAHAY CUNTO LACAG LA'AAN AH HELITAANKEED?

Cuntooyin Iskool oo lacag la'aan ah waxaa hela caruurta waalidkoodu qaataan:

- Caydha nolosha [Income Support]
- Caydha shaqo baafiska
- Taageerada caydheed ee hoos imanaysa qaybta 4-aad ee Xeerka Socdaalka iyo Magangalya-doonka 1999
- Qadarka [jayld benefitka], ee aan xaqa u lahayn kireditka Cashuurta Shaqo
- Dakhli sanadeed (Sidii wakaalada cashuuruhu xisaabisay) aan ka badnayn £13,480

Caruurta qaadata caydha **Inkam Isaboortka** ama caydho shaqo baafiska lagu baxsho Caydhaha shaqo baafisku iyaguna sidooda ayey ugu xaq yeesheen cuntada iskool ee lacag la'aanta lagu baxsho.

Hadaad filaysid inaad xaq u leedahay waxaad iskoolka waydiisan kartaa foom codsi aad buuxisid ama aad kala xiriirtid Qaybta Bixinta lacagtaas:

Tel: 0117 903 6666

KA WARAN DIRAYSKA ISKOOLKA?

Iskoolada Bristol siyaasada lebiska dirayska way ku kala duwan yihiin, iskoolo badan ayaa leh hal lebis oo keliya oo maalintii la xidho iyo mid kale oo isboortiga ah iyo nashaadyada ciyaaraha ah.

Hadii ilmahaagu u baahan yahay xidhashada lebis gaar ah arrimo diini ah awgeed waa inaad kala hadashaa madaxa iskoolka arrintan. Hadii ilmahaagu u baahan yahay xidhashada dhar gaar ah oo diintiisa khuseeya waa inaad kala hadasha madaxa iskoolka arrintan. Hab-dhaqanada diimeed waa in iskoolka laga ixtiraamaa. Hab-timo fidhka oo dhan waa in si hagaajisan ay ku eekaadaan si aan wax shil ah loo sababin ama aan arag fiican laysaga hor-istaagin.

Dahabka iyo weesaaqyada caadi ahaan iskoolka looma soo xidho. Hadii ilmahaagu sabab milada ahaaneed rabo xidhashadooda fadlan kan kala hadala madaxa iskoolka. Ardaydu waxay xidhan karaan saacado iyo dhego xidhashda.

Dhego xidhashada badanaa waa in la bixiyaa xiisada isboortiga awgeed. Tani waa badbaado awgeed. Hadii tani dhibaato keenayso fadlan kala hadal madaxa iskoolka.

Dabaashu waa ka qayb manhajka wadaniga ah. Hadaad rabtid in ilmahaaga dabasha laga reebo ama uu xidho dhar gooni ah, waa inaad la hadasha madaxa iskoolka. Dhaqamada diiniga ah waa la ixtirami oo badbaadada ilmahaagana waa la damaanad qaadi.

ILMAHAYGU GAADIID ISKOOLKA U QAADA MA HELI KARAA?

Caruurta waxay keliya oo gaadiid iskoolka u helaan haday qaban baahi waxbarasho oo gaar ah aanay haystaan warbixin uu ku yaalo xeer tan doonaya. Hadii kale waxaa la bixiyaa oo keliya hadii iskoolku yahay ka ugu dhow uguna haboon (oo waaxda LEA ay go'aan ka gaadhay), oo uu 2 mayl guriga ka fog yahay oo ardayda 8 sano ka yar iyo 3 mayl caruurta u dhaxeysa 8-16 jirka. Hadii ilmuhu uu tago iskoolka miladaha gadiid baa laga yabaa in la bixiyo. Wixii faahfahin ah ee gaadiidka la xiriir:

Education Transport Passenger Service
Tel: 0117 903 6331

NASHAADYO CAYNKEE AH BAA LA HELI KARAA KA HOR ISKOOKKA IYO KA DIBA IYO WAKHTIYADA FASAXA?

Iskoola badan baa qabta wakhti qado ama nashaadyo iskoolka ka dib dhaca, badanaa ilaa saacad dhammaadka casharada ka dib. Nashaadydaasi waa sida isboortiga, metalaada, fanka, tuwayska, iyo naadiyada hawl-guriyeedka. Ficiladaas qaarkood waa bilaash kuwa kalena waxa laga yaabaa inay noqoto in la baxsho qarashkooda. Iskoolda qaar baa quraac baxsha casharada ka hor subaxii. Nashaadyadaa waxaad ka ogaan kartaa ee ka hor iyo ka dib iskoolka dhaca xafiiska iskoolka.

Iskoolada qaarkood baa baxsha daryeel caruureed ka hor iyo ka dib saacadaha iskoolka. Waalidinta waxaa laga yaabaa inay waxyaalaha qaarkood iska bixiyaan.

Hadaad shaqaynaysid oo aad u baahan tahay daryeel maalmeed ama goob dheelid wakhtiyada fasaxyada, waxaa jira habab badan oo sicir caqli gal ah ku shaqeeya. Si aad u heshid warbixin meelaha laga helo ku saabsan iyo sida loo codsado BAND (Bristol Association of Neighbourhood Day-care) lambarka:

**Telefonka: 0117 9542128 ama
Children's Information Service Tel: 0845 129 7217**

**Khadka taagerada ee adeegani wuxuu furan yahay laga bilaabo:
8.00 am/duhurnimo to 4.00pm/ duhurnimo Isniin ilaa Jimce
8.00 am/duhurnimo to 8.00 am/duhurnimo maalmaha Salaasa, Arbaco
iyo Khamiis**

Caruurtaada adaa ka mas'uul ah ka hor intaanu iskoolku bilaabmin iyo ka dib kolkuu dhammaado maalin kasta. Hadaad rabtid qof daryeela ilmahaaga ka hor iyo ka dib iskoolka (sida ilme-ilaaliye), Waxaad kala soo xiriiri kartaa talo-bixin **Adeega Macluumaadka Caruurta** (lambarka sare isticmaal). Adeega tarjumidana waa la heli karaa.

ILMAHAYGA XIISAD MUSIIQO ISKOOKKA MAKKA DHIGAN KARAA?

Macallimiinta Adeega Muusigada Bristol ayaa iskoolada soo booqda oo adeeg baxsha iyo casharo qalab kala jaad jaad ah. Caruurta waxay qaataan casharo iyagoo koox yar yar ah oo aan afar qof ka badnayn. Casharka waa lacag imtixaankii la galaana waa lacag. Hadaad danaynaysid waa inaad madaxa iskoolka la hadashaa. Waxaa kaloo jira iyana fursado ay caruurta kaga qayb qaataan soo bandhigyo muusiga ah.

WAA MAXAY KHIRAD SHAQADEEDKU?

Shaqo khibrad ku qaadshadu [Work experience /waayo-aragnomo shaqo] waa boos shaqo gayn halkaas oo ilmuhu uu dhawr hawlood ku qaato, qiyaastii, siday samayn lahaayeen haday shaqo ku jiri lahaayeen oo kale, laakiin iyadoo culayska la saarayo dhinaca waxbarashada ee khibrad qaadashada. Dawladu dhalanyarta oo dhan labada sano ee ugu danbeeyey waxbarashadooda waxay kula talisay inay ka dhamaystiraan labo usbuuc oo khibrad shaqo u qaadasho ah, si ay uga caawiso u diyaar garawgooda aduunka shaqada. Iskoolka dhexe ee ilmahaaga ayaa kuu fidin doona warbixin dheeraad ah waxa la xiriira khibrad shaqo qaadashada kolka loo baahdo.

SIDAAN ISKOOOLKA UGA QAYB QAADAN KARAA WAALID AHAAN?

Hadaad wakhti u heshid toos uga qayb qaadashada, waxa jira siyaabo kala jaad ah oo aad ku caawin kartid iskoolka ilmahaaga. Tusaale ahaan:

Ururka macallinka/Waalidka (PTA) ama Asxaabta

Hadii ilmahaagu haysto PTA-ga, koox Asxaabeedka ama Golaha Waalidka, tani waa hab fiican ee lagaga qayb qaadan karo, waalidiinta kalena lagu baran karo Ururada PTA-ga qaarkood baa lacag urursha halka qaarkoodna badanaa ka hadalaan arrimo la xiriira wadintaanka maaline ee iskoolka.

Madaxda Iskoolka [School Governor]

Noqoshaad madaxada iskoolka xukuntaa waxay noqon kartaa hab wanaagsan oo lagu ogaado, raad ku yeelashada siyaasadaha iskoolka ilmahaaga. Waa inaad tahay qof waalidka kale soo doorto. Iskoolkaaga ka warso sidaad uga qayb qaadan kartid cidaas iskoolka xukunta.

Khibradaada gaarka ah soo bandhig

Iskoolkaaga kala hadal xirfadaha aad bixin kartid iyo sidaad u rabsid caawinta fasalka ilmahaaga ama iskoolka guud ahaan. Iskoolo badan baa soo dhaweeya imaanshaha waalidka ee caruurta la hadlaaya mawduucyo kala jaad ah sida milada, dalka ay ka yimaadeen iwm taas oo manhajka wadaniga ah ka mid ah.

Iskoolkaaga kala hadal habka aad uga qayb qaadan kartid.

WAA MAXAY HESHIIDYADA GURIGA IYO ISKOOOLKA?

Heshiiska Guri iyo Iskoolkeedka waxay ku saabsantahay iskoolada wadjir ula shaqeenaya waalidka. Waxaa laga yaabaa in lagu waydiiyo saxeexida heshiis mas'uul kaa dhigay waxa ilmahaagu u baahan yahay intuu iskoolka imanayo. Madaxa iskoolka [Head Techer] ayaa ogolaan doona u fidinta ilmahaaga fursadaha barasho iyo ka meel gaadhka sida ugu fiican ee kartidooda ah. Ilmahaagu wuxuu aqbali karaa qaadashada mas'uuliyada qaybtooda. Dokumentinka inaad saxeexdid uma baahnid.

KA WARAN HADAAN DHIB QABO AMA CABASHO?

Waxaad soo booqan kartaa iskoolka oo codsan kartaa la hadalka madaxa iskoolka, macalinka fasalka iyo baraha. Waa muhiim inaad baratid macalinka fasalka ilmahaaga ama barbaariyahooda sida ugu dhakhsaha badan oo aad joogtaysid la kulankiisa inta ilmahaagu la qabsanayo. Waxaad waydiisan kartaa ballan adoo soo wacaaya ama iskeenaya inta maalinta iskoolka wax laga dhigo lagu jiro. Hadii tani suurtoagal noqon waydo, warqad iskoolka loo diro ayaa ku filan. Iskoolada qaarkood waxay leeyihiin buug akhris ama shaqo guri lagu qaato kaas oo fariin ilmahaaga macllinkiisa ugu soo qori kartid. Dhibaatooyinka badankooda ee soo baxa waxa lagu furdaamiyaa wadahalal toos ah aad la yeelatid macllinka ilmahaaga ama madaxa iskoolka.

Hadii cabashadaada waxaba laga qaban waayo, waa inaad u la xiriirtaa madaxda iskoolkaaga xukunta. Madaxda iskoolka waxaa laga rabaa inay yeeshaan hab-cabasho loo soo maro. Kuwaas baa kuu sheegaya sida si rasmi ah cabasho loogu dhiibto. Weydii in iskoolaagu hab ashkato leeyahay oo aad nuskhad ka heli kartid. Madaxa iskoolka waxaa laga yaabaa inuu kulan gaar ah oo cabashadaa lagu eegayo yeesho.

Waaxda (LEA) waa waajib inay yeelato hab ashkato. Hadii ashkatadaadu ay noqoto mid aan iskoolka waxba lagaga qaban karayn ama aanad raali ku ahayn habka iskoolku ula dhaqmayo, talaabadaada taa ku xigtaa waa inay noqoto ogaanshaha hab cabashada LEA:

http://www.bristol-lea.org.uk/services/complaints_schools_x.html

ama la soo xiriir:

**Richard Wyatt, Communications Manager,
Department of Education and Lifelong Learning,
Council House, College Green, Bristol, BS1 5TR
Tel: 0117 9036958
Email: richard_wyatt@bristol-city.gov.uk**

Ugu danbayntii, hadaad aaminsan tahay in madaxada iskoolkaaga xukuntaa ama LEA-du ay si aan 'caqli gal ahayn' u dhaqmaan, waxaad u ashkatoon kartaa wasiirka dawladda ee Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha (DFES).

Qaybta 4-aad

Warbixin dheeraad ah

Marxadaha [Key Stages] iyo tacliinta

Key stage – waa dhawr sano oo waxbarashada iskoolka ilmahaaga ah.

Key Stage 1 - aadku wuxuu daboolaa da'da 5-7 jirka

Tani waa bilawga uu ilmuhu gaadho da'da tacliintu qasab noqoto. Waxay la dhamaata wakhtiga sanad iskoolku dhamaanayo oo ardayda fasalkiisa dhigata badankoodu ka gaadhaan da'da 7 jirka.

Key Stage 2 - aad wuxuu daboolaa da'da 7-11 jirka

Tani waa marxalada la bilaabmaysa isla wakhtiga sanad iskoolku bilaabmo halkaas oo ardayda badankoodu ka gaadhaan da'da sideed jirka. Waxay la dhamaata sanad iskoolka halkaas oo ardayda badankoodu ka gaadhaan da'da sideed jirka. Waxay la dhamaataa isla wakhtiga sanadka iskoolku dhamaado halkaas oo ardayda badankoodu ka gaadho da'da 11 jirka.

Key Stage 3 - aad wuxuu daboolaa da'da 11-14 jirka

Tani waa mudo bilaabmaysa isla wakhtiga sanad iskoolku bilaabmo, halkaas oo ardayda badankoodu da'da 12 jirka ka gaadhaan. Waxay la dhamaataa isla wakhtiga sanad iskoolku dhamaado halkaas oo badanka ardaydu ka gaadhaan da'da 14 jirka.

Key Stage 4 - aad wuxuu daboolaa da'da 14-16 jirka

Tani waa mudo bilaabmaysa isla wakhtiga sanad iskoolku bilaabmo, halkaas oo ardayda badankoodu da'da 15 jirka ka gaadhaan. Waxay la dhamaataa isla wakhtiga sanad iskoolku dhamaado halkaas oo badanka ardaydu dhaafaan da'dii iskool dhigashadu qasabka ahayd.

MAADOOYINKA MANHAJKA WADANIGA

[Reception Age Children] Da'da ilma-qabashada (resebshan ayj – da'da 3- 5jirka)

Meelaha tacliimeedka kusii jeeda Ahdaafta waxbarashada wakhti hore ah waa [Foundation Stage] marxalada Asaasiga ahi waa:

- Koboca qof ahaaneed, bulsheed iyo caadifadeed
- Wadahadalka, luqada iyo wax-akhriska iyo wax-qorka
- Koboca xisaabeed
- Aqoon u yeeladka iyo fahamka aduunka
- Kobaca Muuqaal jidheed
- Koboca hal-abuureed

[Primary Schools] Iskoolada Hoose:

Key Stages 1-aad iyo 2 –aad (Da'da 7-11 jirka)

Maadooyinka Manhajka Wadaniga ah ee iskoolka hoose lagu dhigtaa waa:

- Xisaabta
 - Ingiriisi
 - Saynis
 - Qorshynta iyo tiknolijiyada
 - Aqoonta kombuyutarka iyo isgaadhsiinta (ICT/IT)
 - Taariikhda
 - Juquraafiga
 - Fanka
 - Muusigada
-

- Xisaada isboortiga (PE)
- Waxbarashada Miladaha (RE)

[Secondary Schools] Iskoolka dhexe

Key Stage 3-aad (Da'da 11-14 jirka)

Maadooyinka Mnhajka wadani ee la dhigto marxalada [Key Stage 3] waxaa ka mid ah waa maadooyinka iskoolka hoose lagu dhigto oo dhan iyo weliba luqadaha ajanbiga ee casrigan.

Key Stage 4-aad (Da'da 15-18 jirka)

Maadooyinka Manhajka wadani ee la dhigto marxalada [Key Stage 4] waa:

- Ingiriisi [English]
- Xisaabta
- Saynska
- Isboortiga iyo jimicsiga
- Tiknoolijiyada
- Afafka qalaad
- Koorsooyinka kale ee tababar
- Xul inta hadahay waa mid ku xidhan [la xiriirta] waxa ardaygu doorbidayo

Hay'adaha faa'iidada leh ee kale {Other useful organisations}:

ADEEGA DHALINYARTA EE LOO YAQAAN [*Connexions]

Adeegyada dhalinyarta ee Kawnsalka Magaalada Bristol waxay leeyihiin mashaariic halkaas oo dhalinyartu ay iman karto si lacag la'aan ah, ama ha noqoto xarumo arrinta u qalabaysan ama qaar la kiraysto. Xarumahaasi waxay ku yaaliin meelahan soo socda ee magaalada ah waxaana loo qaban qaabiyaa dhalinyarta da'doodu tahay 13-19 jirka.

Waqooyiga iyo Badhtamaha Bristol [North and Central Bristol]	Koonfurta iyo Bariga Bristol [South and East Bristol]
<ul style="list-style-type: none">• Ashley• Avonmouth• Easton• Brentry & Henbury• Lawrence Weston• Lockleaze• Southmead	<ul style="list-style-type: none">• Barton Hill & Lawrence Hill• Bedminster• Hillfields• Hartcliffe & Withywood• Knowle West• St Anne's

Mid kastoo meelahaas ka mid ah koox shaqaale ah iyo Shaqaalaha Waaxda samafalka ayaa jooga oo adeeg ka bixiya. Dhalinyartu waxay aadi karaan goobta ay doonaan ee meel kasta ku taala.

Waxa kaloo jira goobo dheelsiin caruurta da'da 8-14 jirka ah. Kuwaasi waxay ku yaaliin 4 meelood oo adeega dheelsiinta rasmi ahaani ka jirto, oo meelahan soo socda ah:

- Easton (Felix Road)
- St. Paul's
- Lockleaze
- Southmead

Agaabkan waxaa dheer mashaariic dheelsiin oo samafal ah iyo shaqaale dheelsiin u qaybsan oo baxsha adeega magaalada oo dhan ka jira kooxda da'daas ah.

**Wixii warbixin dheeraad ah ee nashaadyadan ah kasoo wac
Tel: 0117 353 2288**

CONNEXIONS

[Connexions] waa adeeg taageerid oo dawladeed oo dhalinyarta oo dhan loogu talagalay, ka dhaxeeya da'da 13 – 19 jirka. Adeegu wuxuu damacsan yahay bixinta talo, tilmaan iyo helitaanka fursado kobcin qof ahaaneed ee kooxdan, iyo ka caawintooda samaynta u gudbitaan fudud oo qaan gaadhnimo ah iyo nolol shaqyanta. Wuxuu bixiyaa taakulayn wax ku ool ah oo dhinaca doorashada koorasyada saxda ah iyo shaqada ah ay ka mid yihiin helitaanka koboc qof ahaaneed oo balaadhan oo loo marayo nashaadyada isboortiga, fanka, iyo samafalka. Wuxuu kaloo talo-bixin iyo taakulayn ka baxshaa dooriye si-xun-u –isticmaalka, caafimaadka jinsi, hoy la'aanta. Talo-bixiyaal shakhsi oo [hay'ada Connexions] ka tirsan waxay ka shaqeeyaan iskoolo iyo koolajyo kala jaad ah. Si loo ogaado, sida ay [Connexions] u taageerto ilmahaaga, lasoo xiriir iskoolkaaga ama koolajka. [Connexions] waxaa lagala xiriira karaa:

Tel: 0117 987 3700

LAYBAREERiyADA BRISTOL [LIBRARIES]

Laybareeriyada waxaa laga heli karaa meel kasta oo Bristol ka mid ah waana u bilaash ilmahaaga si uu ugu isticmaalo waxbarasho ugana daynsado buug. Kombuyutarada waxaa laga heli karaa laybareeri kasta oo Bristol ku yaala, una furan isticmaalka dadka waaweyn iyo dhalinyarta.

Gelitaanka Internetku waa mid la heli karo. Caruurto, daabacaada warqadaha lacag la'aan bay ku heli karaan. Saacadaha la furaa waa kala gedisan yihiin, kolkaas waxaad u baahan tahay inaad ka hubisid laybareerigaas aad rabtid.

Buug labo-luqoodle ah ma laga helaa laybareeriyada?

Buug luqado kala jaad ah ku qoran ayaa laybareeriyada badankooda yaala. Hadii, luqada aad raadinaysaa aanay oolin, buugta waxaa laga codsan karaa laybareeriga ra'iisiga ah **Tel: 0117 903 7216**. Waxaad kaloo laybareeriga agtaada ka codsan kartaa soo iibinta buug, luqadaada ku yaala.

Laybareeriga degaankaga [Local Library]	Cinwaanka [Address]	Telefoon
Avonmouth	Avonmouth Road BS11 9EN	0117 982 8872
Bedminster	East Street BSY 4HY	0117 956 3452
Bishopsworth	Bishopsworth Road BS13 7LN	0117 964 2094
Cheltenham Rd	Cheltenham Rd BS6 5QX	0117 942 4160
Clifton	Princess Victoria St BS8 4BX	0117 973 0315
Eastville	Muller Road BS5 6XP	0117 951 6014
Filwood	Fillwood Broadway BS4 1JN	0117 966 1671
Fishponds	Fishponds Road BS16 3UH	0117 965 368
Hartcliffe	Peterson Square BS13 OEE	0117 964 2353
Henbury	Crow Lane BS10 7DR	0117 950 1969
Henleaze	Northumbria Drive BS9 4HP	0117 962 2417

Hillfields	Summerleaze BS16 4HL	0117 965 3249
Horfield	Filton Avenue BS7 OBD	0117 969 2928
Knowle	Redcatch Road BS4 2EP	0117 977 6304
Lawrence Weston	Stile Acres BS11 0QA	0117 982 2432
Marksbury Rd	Marksbury Road BS3 5LG	0117 966 3144
Redland	Whiteladies Road BS8 2PY	0117 973 5985
Sea Mills	Sylvan Way BS9 2NA	0117 968 1532
Shirehampton	Station Road BS11 9TU	0117 982 2184
Southmead	Greystoke Avenue BS10 6AS	0117 950 7107
St George	Church Road BS5 9AL	0117 955 6277
Stockwood	Stockwood Road BS14 8PL	01275 837 623
Trinity Road	Trinity Road BS2 ONW	0117 955 6202
Westbury	Falcondale Road BS9 3JZ	0117 950 2527
Wick Road	Wick Road BS4 4HE	0117 977 6314
Mobile Library	c/o Bedminster Library	0117 963 7622

WARBIXIN CAYNKEE AH BAAN HELI KARAA IGA CAAWISA TAAGEERISTA WAXBARASHADA ILMAHAYGA?

Nuskhado dhawr buugyare kuwaas oo kaa caawin kara taageerida waxbarashada ilmahaaga, waxaa lagu helaa luqado kala duwan. Waxaad kari kartaa inaad ka codsatid adoo usoo maraya iskoolka ama waxaad nuskhado ka heli kartaa adoo lasoo xiraaraya

Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha (DFES)

ka wac Tel: 0845 602 2260

[Learning Journey] Safarka waxbarasho:

- Tilmaanta waalidka ee manhajka iskoolka Hoose [primary school]
- Tilmaanta waalidka ee manhajka iskoolka [secondary school]

Fiidyowyada barashada xisaabta ee guriga iyo iskoolka

- Xisaabta oo guriga iyo iskoolka ah
- Akhriska iyo qoraalka si wadajir ah: Boggaga internetka ee barashada guriga iyo iskoolka

[DFES] ayaa u dejisay bog internetka ah waalidiinta, kaas oo leh warbixin iyo agaab fa'iido leh. Buugyare Warbixino aad u farabadan oo 11 luqadaha bulshada ku qoran ayaa halkaa laga heli karaa. Waxaad ka heli kartaa:

www.parentscentre.gov.uk

Websayd **Baadhida Iskoolka** ayaa iyana kuu saamix doonta, ku baafinta iskoolada magacooda ama boost koodhkooda:

- Jadwalka heer natiijada waxqabadkooda
 - Warbixinda kormeerayasha [Ofsted]
 - Websaydka iskoolku leeyahay, haday mid (ay) leeyihiin [uu jiro]
-

Meelaha wakhti qaadashada loo tegi karo ee ku yaala saydka ayaa kuu sheegi kara dhacdooyinka iyo goobaha la tago ee agtaada ee ilmahaaga ku haboon. Websaydka waxay kaloo ku taxan tahay boggaga kale oo internetka oo ilmahaaga ka caawin kara waxbarashada.

Adeega Warbixineed ee Caruurta wuxuu leeyahay kayd macluumaad ku saabsan nashaadyada / taageerada caruurta iyo qoysaska. Websaydkoodu waa:

www.cisbristol.co.uk

The Ethnic Minority Achievement service website is:

<http://emas.bristol-lea.org.uk>

Saydkani wuxuu wataa tilmaamid iyo macluumaad ku saabsan taageerida ardayda isir ahaan laga badan yahay ee iskoolada dhigata. Waxa halkaa ku jira oo kale faahfaahin ku saabsan dhacdooyinka deegaanka iyo kuwa wadniga ah kuwaas oo khuseeya arrimaha dadka isir ahaan laga badan yahay.

Kuwaas waxa ka mid ah u dabaaldegyada xafladaha miladaha, xuska dhacdo taariikhi ah, u dabaaldega shakhsi ahamyda mudan taariikh ahaan, iyo goob xaraashida buugta ah.

Waxaa kaloo ku jira dhacdooyin loogu ololaynayo sinaanta isirada, ka hortaga cunsirinimada, ama xaflad u dhiga kala duwanaanshaha isirada.

Kooxda LEA ee sinaanta isirada iyo ka qayb gelintooda, waxay leedahay bog internetka ah kuwaas ku shaqo leh siyasadaha iyo qawaaniinta ay tahay in iskooladu raacaan ee khuseeya sinaanta isirada iyo meelaha kale sida xadgudubka isir, la tashiga iyo shaqalaysiinta.

[Connexions] waxay leedahay websayd talo-bixin siri ah oo dadka dhlinyarta ee ka dhexeeya da'da 13-19 jirka loogu talagalay. Websaydkani waxay ka jawaabaysaa su'aalo waxbarasho iyo qaar kale oo khuseen kara dhalinyarta.

Waxaa lagala xiriiri kraa:

Tel: 0117 987 3700

www.connexions.gov.uk

Cinwaano faa'do leh

**[KAWNSALKA
WAAXDA WAXBARASHADA IYO
TACLIINTA TAXANAHA AH]**

**BRISTOL CITY COUNCIL
DEPARTMENT OF
EDUCATION AND
LIFELONG LEARNING**

**[Kooxda Ogolaanshaha]
Admissions Team
PO Box 57
College House
College Green
Bristol BS99 7EB
Tel: 0117 903 7694
Fax: 0117 903 7710**

**[Kooxda Deeq bixinta]
Awards Section
PO Box 1111
College House
College Green
Bristol BS99 2EZ
Tel: 0117 903 666**

**[Waxbarashada Caruurta Hoyga
Lagu hayo]
Education of Children
Looked After
Service (Looked After
Children Service)
1B Amercombe Walk
Stockwood
Bristol BS14 8AN
Tel: 01173773062**

**[Adeega Daryeelka Waxbarasho]
Education Welfare Service
Kings House
Bond Street
Bristol BS1 3AE
Tel: 0117 903 7142
Fax: 0117 903 7147**

**[Adeega Meel Gaadhka Dadka
Isirka yar]
Ethnic Minority Achievement
Service
(EMAS)
Bristol Education Centre
Sheridan Road
Horfield
Bristol BS7 OPU
Tel: 0117 903 1365
Fax: 0117 903 1369**

**[Kooxda Sinaanta ka qayb
gelinta]
Equalities and Inclusion
Team
Education and Lifelong
Learning
College House
College Green
Bristol BS99 7EB
Tel: 0117 903 7722**

**[Kooxda Qaxotiga]
Refugee and Asylum
Seekers Team**

This Team can be contacted
at the EMAS office
Tel: 0117 903 1279

**[Qaybta Baahida Tacliimed ee
Gaarka ah]
Special Education
Needs(SEN) Section**

P0 Box 57
Council House,
College Green
Bristol BS99 7EB
Tel: 0117 903 7735
Fax: 0117 903 7738

**[Ka baxsan Waaxaha Kooxda
Qaxootiga]
Outside the Departments
Asylum Seekers Team**

Manager
Social Services/Health
Tel: 0117 903 6672
Email:
sswla@bristol-city.gov.uk

**[Isbahaysiga Adeega Socdaalka]
[Avon Consortium for
Traveller Education
Services (Traveller
Education Service)**

Charborough Road
Filton
Bristol BS34 7RA
Tel: 01454 862620
www.southglos.gov.uk/traveller_ed

**[Adeega Talobixinta Shaqo ee
Dhalinyarta]
Connexions**

Connexions West of England
Floor 1, 4 Colston Avenue
Bristol BS1 4ST
Tel: 0117 987 3700
Fax: 0117 987 3701

Refugee Action

Senate House
36 Stokes Croft
Bristol BS1 3QD
Tel: 0117 989 2100

Social Services and Health

Tel: 0117 903 6684
Fax 0117 903 6688
Email: caredirect@bristolcity.gov.uk

**[Taageerista Waalidka Ilma Baahi
Gaara qaba]
Supportive Parents for
Special Children**

3rd Floor, Royal Oak House
Royal Oak Avenue
Bristol BS1 4GB

Information & Support:

Tel: 0117 9897725

Admin & Fax: 0117 9897724

Email: supportiveparent@aol.com

**[Adeegyada Dhalinyarta]
Young People's Services
Administrative
Headquarters**

Avonquay
Cumberland Basin
Bristol BS1 6XL
Tel: 0117 353 2277
Fax: 0117 353 2288

Abjadiyada Ereybixnta [Glossary of Terms]		Boggan eeg
College of FE	Kuliyada waxbarashada sare halkaas oo caruurta u tegi karto waxbarashada 16 jirka ka dib maraka qaarkoodna da'daa ka hor	14
DfES	Waxda Waxbarashada iyo Xirfadaha – qaybta dawlada ee mas'uulka ka ah waxbarashada	19
EAL	Af-ingiriisiga oo luqad dheerad ku ah qof	19
EMAG	Deeqda natiijo-gaadhida Dadka Isir ahaan laga badan yahay	19
EMAS	Adeega Natiijo-gaadhka Dadka Isirka yar	19
EWS/EWO	Adeega / Sarkaalka Daryeelka Waxbarasho	20
Foundation Stage	Manhaj caruurta da'da 3-5 sano ka dhexeeya	13
GCSE	Shahaado Guud ee Waxbarashada Dhexe	13
IEP	Qorshe Tacliimeed shakhsi oo ardayda Baahiyaha Tacliimeed ee Gaarka qaba	17
Key Stage	Dhawr sano isu-gayn iskool dhigasho ah	12
LEA	Laanta Waxbarasho ee Rasmiga ah	1
Learning Mentor	Shaqaalysiin lagu taageerayo waxbarashada caruurta iyo is-xaadiriskooda	16
LSA	Taakulaynta Taageerida Tacliimeed	16
PRU	Qaybta usoo gudbinta Ardayga	22
PTA	Ururka Waalidka macallinka, maraka qaarkood loo yaqaan "Friends"	27
Reception Class	Sanadka ugu horeeya ee iskoolka caydiga ama iskoolka Hoose	6
SATS	Hab-calaamad helitaanka rasmiga ah	13
SEN	Baahi Tacliimeedka Gaarka ah	17
SENCO	Isku-dubaridaha Baahi Tacliimeedka Gaarka ah	17
SMSA	Kalkaaliyaha maamullaha Cunto Iskoolka ("Dinner Lady")	16
Statement	Warbixinta baahiyaha iyo taageerida ilmaha [SEN] qaba	17
TA	Taageeraha Macalin	16

Waxbarashada iyo Tacliinta Socdaalka ah
{Education and Lifelong Learning}

Hadaad doonaysid in dokumentigan qaab kale loo soo saaro sida farta dadka indhaha la', far waaweyn, cajil maqaal ah ama mid kombutar, ama luqad bulsheed ah, fadlan lasoo xiriir:

Ethnic Minority Achievement Service (EMAS)
Bristol Education Centre
Sheridan Road
Horfield
Bristol BS1 OPU

Tel: 0117 903 1365
Fagska: 0117 903 1369